# COVID-19 iyo horumarka waara ee Soomaaliya/Somaliland

## Warbixinta Wejiga 2aad

Eric Herring, Peter Campbell, Mustafe Cilmi, Latiif Ismaaciil, Jamaal Jaamac, Sandra McNeill, Cabdi Rubac, Asma Saciid, Amel Saciid, Muna Yuusuf

Jaamacadda Bristol iyo Transparency Solutions

Luulyo 2020



University of BRISTOL

GCRF Global Challenges Research Fund

Transparency Solutions

# COVIDEV

COVIDEV waxa uu ka dhashay cilmi-baaris iyo iskaashi ay sameeyeen Jaamacadda Biristool iyo Transparency Solutions oo ku saabsan dhowrista iyo dhiirigelinta horumarka waara ee Soomaaliya/Somaliland inta lagu gudo jiro, iyo iyadoo la adeegsanayo habka ka falcelinta Covid-19.

Barnaamijkan inta lagu gudojiro, horumarka waara waxaa looga jeedaa sii wanaajinta nolosha, maciishada iyo ka-qaybgalka arrimaha bulshada ee jiilka maanta iyo kuwa mustaqbalka, si ay nolosha qiimiga u leh ugu noolaadaan hab saamaxaya badhaadhaha caalamka dabiiciga ah.

COVIDEV waxa uu qeyb ka yahay barnaamijka Dadaalka Soomaaliyeed ee Ugu horreeyay ee dhiirigelinaya horumar dhinacyada oo dhan ah oo ay Soomaalidu hormuud ka tahay. Waxaa barnaamijkan iska kaashanaya Jaamacadda Biristool iyo Transparency Solutions. Transparency Solutions waa bahwadaagta istiraatiijiga ah ee rasmiga ah ee Jaamacadda Biristol.

# TUSMO


Mahadnaq . . . . . 2
Shaxda . . . . . 3
Hordhac . . . . . 4
Falcelinta COVID-19 ee heer degmo . . . . . 5
Helitaanka daryeel caafimaad . . . . . 7
Kalsoonida lagu qabo tayadadaryeelka caafimaad . . . . . 10
Qiimaynta warbixinta wejiga 1aad . . . . . 12
Baahin . . . . . 17
Falanqayn . . . . . 22
Gabogabo . . . . . 27

# MAHADNAQ

Howshan waxaa taageeray laanta Caafimaadka Guud ee Caalimga ah ee Machadka Elisabet Balaakwell ee Cilmi-baadhista Caafimaadka, ee laga maalgeliyo istiraatiiji-yadda QR GCRF ee Jaamacadda Bristol. Waxaan Bare Sare Rayshal Gooberman-Hill, Agaasimaaha Mac'hadka Elisabet Balaakwell ee Cilmi-Baadhista Caafimaadka ee Jaamacadda Bristol uga mahadcelinayanna sida ay noogu dhiirigelisay inaan cod-sanno mashruucan.

Waxaan u mahadnaqayaa Cabdi Jaamac oo Soomaali u turjumay nuqulka warbix-intan ee la soo koobay: labada nuqul ee warbixinta waxaa laga heli karaa degelka/websiteka Transparency Solutions ee internetka.

Mahadda ugu badan waxaan u celinaynaa ka-qaybgalayaasha mashruuca sida ay noo-la wadaageen aragtiyahooda iyo aqoontooda: Hodan Axmed, Cabdiraxmaan, Sucdi, Cabdalla Maxamuud, Faadumo Axmed, Sharifow Maxamed, Nasra Cali, Jamiila Xaaji, Warsame Cumar, Sahra Qorane, Axmed Cabdillaahi, Nafiisa Xuseen, Fariido Xuseen Qaasin, Aadan Cabdiraxmaan, Xaliima Cabdi, Xaawa Ibraahin, Maxamed Axmed, Sihaam Maxamed, Cali-Dhuux Maxamed, Maxamed Cali, Maryan Maxamed Xaaji Xuseen, Rooble Maxamed, Habboon Kaysar, Cabdi, Axmed Ibraahin, Asma Aweys, Suleekha Cabdillaahi, Darduus Maxamed, Hodan Axmed, Cabdiwahaab Daa'uud, Najaad Xuseen, Cali Xaamid Mansuur, Cabdirashiid Muuse Taani iyo Cabdillaahi Ibraahin. Waxaan ku rajo weynnahay in warbixintani ay si wax ku ool ah uga turju-mayso aragtiyihii iyo aqoontaad na la wadaagteen.

**Bare Sare Eric Herring**

Dugsiga Cilmiga Bulshada,
Siyaasadda iyo Diraasaadka
Caalamiga ah,
University of Bristol
eric.herrring@bristol.ac.uk
www.bristol.ac.uk/spais

**Latiif Ismaaciil**

Agaasimaha Fulinta, Transparency Solutions
Somalia, Somaliland, Puntland, Kenya
latif.ismail@transparencysolutions.com
www.transparencysolutions.com

# SHAXDA


**Shaxda 1aad:** Falcelinta heer degmo ee COVID-19 – Muqdisho

**Shaxda 2aad:** Falcelinta heer degmo ee COVID-19 – Hargeysa

**Shaxda 3aad:** Helitaanka daryeel caafimaad – Muqdisho

**Shaxda 4aad:** Helitaanka daryeel caafimaad – Hargeysa

**Shaxda 5aad:** Kalsoonida lagu qabo tayada daryeelka caafimaad – Muqdisho

**Shaxda 6aad:** Kalsoonida lagu qabo tayada daryeelka caafimaad – Hargeysa

**Shaxda 7aad:** Qiimaynta warbixinta wejiga 1aad – Muqdisho

**Shaxda 8aad:** Qiimaynta warbixinta wejiga 1aad – Hargeysa

# HORDHAC

Soomaaliya/Somaliland waxa ay kamid tahay caalamka meelaha ugu awoodda yar marka la eego  latacaalidda COVID-19 (cudurka koroon-afayraska) sababo badan oo la xiriira baahida saboolnimada, helitaanka daryeelka caafimaad oo hooseeya, iyo tamar darrada dowladda aw-good. Aad ayaa ay uga durugsanaayeen gaari-taanka horumar waa ka hor intii ayna dhibaata-dani imanin. COVID-19 iyo ka falcelintiisu waxa uu halis ku yahay horumar kasta oo ay hore u gaadheen Soomaaliya/Somaliland.

Mashruucani waa mid aanu ugu kuurgalnay sidii loo dhiirigelin lahaa horumar waara ee Soomaaliya/Somalialnd inta lagu gudo jiro, iyada oo la adeegsanayo habka ka falcelinta COVID-19. Waxa aanu baaritaankan u marnay fa-lanqayn/wadasheekaysi aanu la samaynay dad ku sugan Muqdisho (caasimadda Soomaaliya) iyo Hargeysa (caasimadda Somaliland). Horumar waara waxa aan uga jeednaa sii wa-naajinta nolosha, maciishada iyo ka-qaybgalka arrimaha bulshada ee jiilka maanta iyo kuwa mustaqbalka, si ay nolosha qiimiga u leh ugu noolaadaan hab saamaxaya badhaadhaha caalamka dabiiciga ah. Somaliland 1991 kii ayaa ay dhan keli ah kaga dhawaaqday inay ka mad-axbannaan  tahay Soomaaliya. Intaas wixii ka danbeeyay iyada ayaa is-maamulaysay balse aqoonsi caalami ah uma ay helin in ay tahay qa-ran madaxbannaan; sidaas darteed ayaa aannu u adeegsannay Soomaaliya/Somaliland meeshii munaasib ku ah.

Dadka aanu la hadalnay waxa ay u badnaayeen kuwo aan si dhammaystiran qeyb uga ahayn bulshadooda sababo la xiriira akhris-qoraal la'aan, jinsi, dhalinyaro, ka tirsanaanta reero laga tiro badan yahay ama koox sinji oo laga tiro badan yahay, ama ba ahaanshaha shaqaale dabaqad hoose ah, xoolo-dhaqato reer miyi ah, ganacsade yar oo aan rasmi ahayn, ku barka-cay dalka gudihiisa ama qaxoonti ka yimi dal kale. Mararka qaar dhinac kamid ah ka-qayb-gal la'aanta sida jinsiga ayaa waxaa dheelitira dhinac kale oo kamid ahaanshaha ah sida dakhli sarreeya. Haseyeeshee, inta badan dhinacyada ka-qaybgal la'aantu bulshadu waa ay is-xooji-




yaan  oo isla fal galaan, sida inay kulmaan da-khli hoose, barakac dalka gudihiisa ah iyo qoris-akhris la'aan. Sida oo kale arrimahaas waxa aanu kala hadalnay dad sedbursiimo dheeraad ah haysta –  caafimaadka dowladda, shaqaalayn, iyo kamid ahaansho (sida xuquuqaha haween-ka) iyo howlwadeenno sare iyo dhexe oo ka howlgala shirkadaha isgaarsiinta. Sababta loo la hadlay dadyow kala duwan marka laga fiiri-yo dhincayo badan waa in qaddiyadahan laga arko dhinacyo kala duwan, iyo in fursad la siiyo dadka aan la dhegaysan ka-qaybgal la'aanta awgeed.

Warbixintani waxa ay ku salasayn tahay we-jigii labaad ee hawsha mashruuca. Tafaasiisha habraaca guud ee wejiga 1aad iyo wejiga 2aad iyo natiijooyinkii wejigaa 1aad, fadlan ka dhee-ho degelka/websiteka Transparency Solutions warbixinta hordhaca ah oo ku qoran af Ingiriisi iyo Soomaali labada ba.

Wejiga labaad waxa aannu seddex waraysi oo taxane ah iyo  wadasheekaysiyo  layeelannay afartan qof (labaatan jooga Muqdisho iyo la-baatan Hargeysa jooga) intii lagu jiray bishii July 2020. Caafimaadka iyo bedqabka cil-mi-baadhayaasha iyo ka-qaybgalayaasha ee la xiriira COVID-19 ayaa la sugay iyada oo adeeg-sanayo habab aan toos ama weji kaweji ahayn, sida taleefan ama internet.

# FALCELINTA COVID-19 EE HEER DEGMO

Ka-qaybgalayaasha waxaa la weydiiyay, **"Waa maxay qiimayntaada guud ee ka falcelinta COVID-19 ee degmadaada?"** Waxaa lagu qiimeeyay halbeeg u dhaxeeya "Aad u wanaagsan" ilaa "Aad u liita".

**Shaxda 1aad: Falcelinta heer degmo ee COVID-19 – Muqdisho**

| Aad u wanaagsan | Wanaagsan | Mana wanaagsana mana liidto | Liidta | Aad u liidta | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|---|---|
| 0 | 1 | 5 | 5 | 6 | 3 |

**Shaxda 2aad: Falcelinta heer degmo ee COVID-19 – Hargeysa**

| Aad u wanaagsan | Wanaagsan | Mana wanaagsana mana liidto | Liidta | Aad u liidta | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|---|---|
| 2 | 15 | 3 | 0 | 0 | 0 |

Jawaabaha Hargeysa iyo Muqdisho aad ayay u kala duwanaayeen. Ka-qaybgalayaasha Muqdisho oo ku filiqsan degmooyin dhowr ah (shaxda degmooyinka ee bilowga), si taban ayaa ay u arkayeen ka faleclinta COVID-19, iyada oo 50% in ka badan ka-qaybgalayaashu ay ku jawaabeen "liidata" ama "aad u liidata".

*"Wax ka hortag ah kuma aannaan arag degmadan. Warbaahinta iyo xafiisyada rasmiga ah ee dowladda oo keli ah ayaan ka maqalnay arrinka COVID-19. Dugsiyada ayuun baa la xidhay, dhinacyada kale oo noloshu si wanaagsan baa ay u socdeen."* (KQ10 – Dhalinyaro)

*"Saraakiisha degmadu markii hore waxa ay u muuqdeen kuwo ka falcelinaya COVID-19. Waxa ay yimaaddeen xaafadaha, waxa ayna sawirro la galeen bulshada, balse dib wax war ah ugama aannaan helin."* (KQ17 – shaqaale dabaqad hoose ah)

Magaalada Muqdisho, dareenka ka maqnaanshaha heer degmo ee ka falcelinta COVID-19 waxaa hoos u dhigtay aragtiyaha ah in Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) ay hoggaaminaysay falcelinta, oo ayna hormuud ka ahayn maamullada degmooyinku.

*"Howsha ka falcelinta COVID-19 waxaa wadday DFS iyo BRA; dowladaha hoose waxa ay qaadanayeen kaalin taageero ah oo keli ah."* (KQ20 – qof Laxaad la')

*"Waxa aan arkay dad wacyigelin samaynaya balse waxaan ogahay in ay ka socdeen dowladda hoose ee Muqdisho ee ayna ahayn maamulka degmada."* (KQ14 – barakace dalka gudihiisa ah)

Ka-qaybgalayaasha ay hoosayso metalaaddooda bulshada dhexdeedu waxa ay ka warrameen in masuuliyiin ka socota maamulka degmadu ay bilowgii booqdeen aagaggooda, balse ay yarayd la socoshada danbe.

*"Masuuliyiinta degmadu markii hore waxa ay u muuqdeen kuwo ka falcelinaya COVID-19. Waxa ay yimaaddeen xaafadaha, waxa ayna sawirro la galeen qaar kamid ah bulshada, balse dib wax war ah ugama aannaan helin."* (KQ17 – shaqaale dabaqad hoose ah)

*"Waxaa booqasho noogu yimid dadka ka socda dawladda hoose kuwaas oo nasiiyay mishiinada gacmaha lagu dhaqdo iyo talooyin."* (KQ15 – Katirsan dadka laga tirada badan yahay)

Deegaannada miyiga ah ee ka ag dhow Muqdisho waxaa la sheegay in ayna dareemin wax ka falcelin ah oo ku aaddan xanuunka.

*"Ka falcelinta COVID-19 ma ay soo gaarin tuulooyinka yaryar ee deegaannada miyiga ah gebi ahaan ba."* (KQ19 – xoolo dhaqato reer miyi ah)

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay muujiyeen aragtiyo ka duwan kuwa Muqdisho, iyada oo 75% ku jawaabeen in ka falcelinta heer degmo ee COVID-19 uu ahaa mid "Wanaagsan".

*"Waxa ay hubiyeen kala-fogaanshaha dadka ee gaadiidka dadweynaha"* (KQ30 – Dhalinyaro)

*"Dadku waxa ay qaadeen, oo weli qaadaan, tallaabooyinka ka hortagga ah sida xidhashada maskarada; Weli waan adeeegsadaa anigu ba."* (KQ36 – xubin kamid ah sinjiyad laga tiro badan yahay).

Sababta cad ee soo noqnoqonasay ee aragtiyaha togan ee ka-qaybgalayaasha Hargeysi waa dedaallada wacyigelinta ee laga fuliyay degmooyinkooda, taas oo dadka u saamaxday inay ku dedaalaan nadaafadda iyo kala-fogaanshaha dadka.

*"Waxaan ku fasiri karaa inay dedaallo badan la geliyay hababka ka hortagga; dhiqista gacmaha, maskarooyinka (afxidhka), kala durugga dadka, farriimaha ku baxayay taleefannada gacanta, kala fogaanshaha dadka marka ay dukaamada ka adeeganayaan, sii wanaajinta nadaafadda ee dowladda hoose, wacyigelinta dalka oo dhan, iyo xannibaadaha lagu soo rogay masaajiddada, iwm. Gaar ahaan dadku waxa ay aad ugu dedaaleen gacmo dhaqista. Farriimahaas si wanaagsan ayaa loo gudbiyay, dad kuna waxa ay heleen xirfadihii iyo aqoontii."* (KQ40 – Qof laxaad la')

*"Wacyigelin fiican ayaa ay ka sameeyeen degmo-hoosaadyada oo dhami; kuwaas oo awoodda saaray dhaqannada ka hortagga, halbeegyada loo baahan yahay, dad kana uga warramayay COVID-19. Waxa uu ahaa dedaal joogto ah oo dad badani ay arkeen. Dabcan, waxaa jiray gaabisyo la xidhiidha buuxinta halbeegyada."* (KQ35 – beelaha laga tirade badan yahay)

*"Xannibaado adag ayaa lagu soo rogay isu imaanshaha dadka ee deegaannada cidhiidhiga ah. Carruurta waxaa lagu tabobaray dhaqannada aasaasiga ah ee nadaafadda sida gacmo dhaqista, ku qofacidda iyo hindhisidda suxulka, iyo inay dhaqannadaas ku joogteeyaan guryahooda. Dadku waxa ay qaateen dhaqannadaas, weyna joogteeyeen."* (KQ34 – Barakace dalka gudihiisa ah)

Laba ka-qaybgale ayaa soojeediyay in muwaadiniinta Hargeysa ay iyagu hormuud ka ahaayeen, hubinayeenna in la raaco tallaabooyinka ka hortagga COVID-19, iyada oo aan dowladda hoose wax badan ku darsan.

*"Dadka ayaa iyagu xakameeyay dhaqdhaqaaqooda; gaar ahaan in ayna tegin meelaha bulshadu isugu soo ururto. Waa waxa aan anigu shaksiyan arkay, taas oo aad iiga farxisay."* (KQ37 – Shaqaale dabaqad hoose ah.)

*"Dowladda hoose waxa ay ahayd door intaas ka weyn ka qaadato ka falcelinta COVID-19, maadaama ay masuul ka tahay degmooyinka oo dhan. Waxa keli ah ay qabteen waxa ay ahayd inay kiraysteen dhowr gaadhi oo cod-baahiyayaal lagu xidhay, oo wareega suuqa hoose oo dadka ku boorrinayay inay kala fogaadaan."* (KQ28 – Gabadh)

Sida Muqdisho oo kale, ka-qaybgalayaasha oo dhami maamullada degmooyinka kama ay arag heer isku mid ah oo xidhiidh ah; gaar ahaan dadka ku sugan deegaannada miyiga ah ee ka baxsan Hargeysa.

*"Haddaanu nahay dadka miyiga jooga, ma aannaan arag wacyigelin badan. Taageerada inteeda badan waxaa la siiyay magaaalooyinka sida Gabiiley oo kale. Waxa aanu aragnay in barnaamijyo badan laga fuliyay magaalooyinka Gebiley, Tog-wajaale, Alley-Baday, iyo Kalabaydh ee Gobolka Gebiley. Bulshada reer miyiga ahi waxa ay heleen wacyigelin aad u yar."* (KQ39 – Xoolo-dhaqato reer miyi ah)

# HELITAANKA DARYEEL CAAFIMAAD

Iyada oo awoodda la saarayo helitaanka daryeel caafimaad, ayaannu weydiinnay ka-qaybgalayaasha, **"Kuwan tee baa ugu dhow in ay tilmaamto xaaladdaada iyo ta qoyskaaga ee haatan?"**

**Shaxda 3aad: Helitaanka daryeel caafimaad – Mogadishu**

| Badanaaba waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo weyn | Mararka qaar waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo weyn | Sida caadiga ah waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo xaddidan | Mararka qaar waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo xaddidan | Inta badan mar na ma awoodo helitaanka daryeel caafimaad oo xaddidan xitaa | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|---|---|
| 6 | 3 | 2 | 3 | 6 | 0 |

**Shaxda 4aad: Helitaanka daryeel caafimaad – Hargeysa**

| Badanaaba waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo weyn | Mararka qaar waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo weyn | Sida caadiga ah waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo xaddidan | Mararka qaar waan awoodaa helitaanka daryeel caafimaad oo xaddidan | Inta badan mar na ma awoodo helitaanka daryeel caafimaad oo xaddidan xitaa | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 4 | 4 | 7 | 4 | 0 |

Muqdisho, 45% ka-qaybgalayaashu waxa ay sheegeen inay awood u leeyihiin inay heli karaan daryeel caafimaad oo weeyn heer uun. Haseyeeshee, 25% ayaa sheegay inay u badan yihiin markasta inay tahli waayaan helitaanka xataa daryeel caafimaad oo xaddidan. Helitaanka daryeelka caafimaad waxa uu sida la sheegay had iyo jeer ku xidhan yahay xaaladda maaliyadeed ee qofka.

*"Bilaash ma aha daryeelka caafimaad, balse waxa aan kamid ahay dadka yare e sedburgisa leh ee heli kara. Waxaan ahay xirfadle caafimaad; waxa aan ka shaqeeyay cisbitaallo kala duwan, dhakhaatiirta Muqdisho intooda bandanna waan aqaannaa. Taas ayaa aniga iyo qoyskayga noo fudaydisa inaannu helno daryeel caafimaad, balse dadka oo dhami ma aha sidayda oo kale."* (KQ1 – shaqaale caafimaad oo dawladeed).

*"Waan heli karaa daryeel caafimaad oo weeyn, haseyeeshee waa qaali, waxa aanu ku xidhan yahay xaaladdayda caafimaad."* (KQ4 –shaqaale shirkad isgaadhsiineed)

*"Soomaaliya haddaad lacag haysatid, waad heli kartaa daryeel caafimaad. Dalku ma laha daryeel caafimaad oo bilaash ah; waxa ay ku xidhan tahay dakhligaaga iyo xaaladdaada. Aniga iyo qoyskaygu ma helno daryeel caafimaad sababta oo ah dakhligayga ayaa aad u hooseeya."* (KQ6 – ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

*"Helitaanka daryeel caafimaad ee aniga iyo qoyskaygu waxa uu ku xidhan yahay awooddayada inaan isku bixinno kharashka. Sida oo kale waxa ay ku xidhan tahay adeegga aad u baahan tahay. Haddii xaaladdaadu adag tahay waxa aad u baahan tahay lacag badan, annaguna lacag sidaas u sii badan ma haysanno. Ma jiro adeeg caafimaad oo bilaa lacag ah."* (KQ12 – qof aan waxna qorin waxna akhrin).

*"Adeegyada laga ma helo meel kasta; daryeel caafimaad in aannu ka helno aaggayaga ayaannu u baahannahay. Helitaanku waxa uu ku xidhan yahay awooddaada dhaqaale."* (KQ 8 – Gabadh)

Mas'uul dowladeed oo Muqdisho jooga ayaa sheegay, in la bilaabay adeeg daryeel

caafimaad oo bilaash ah, in kasta oo karaankiisu xaddidan yahay, sidaas darteedna ay heli karaan bukaanka COVID-19 gaar ahaan.

"*Soomaaliya, helitaankaaga daryeelka caafimaad waxa uu ku xidhan yahay awoodda aad u leedahay inaad tegtid cisbitaalka. Guud ahaan, ma lihin daryeel caafimaad oo bilaash ah, balse bukaanka COVID-19 dowladdu sidii hore wax ayay ka bedeshay. In kasta oo karaanku/awooddu ka hooseeyo/so intii loo baahnaa, haddana dadka waxaa la dhigaa cisbitaalka Di Martino lacag la'aan.*" (KQ2 – masuul ka shaqeeya shaqaalaysiinta dowladda)

Jiritaanka daryeelka caafimaad ee bilaashka ah waxaa sheegay labo ka-qaybgale, iyada oo shardigu yahay in aanu wax ku ool ahayn guud ahaan, ama loogu talogalay qeybo gaar ah oo kamid ah bulshada.

"*Waa laga helaa aagayaga, adiga ayaana kala dooran kara; haddii aad dakhli badan heshid oo aad awooddid inaad iska bixisid kharashka daweeyntaada, cisbitaalka aad doontid ayaad tegi karta sida Digfeer ama dhakhtar kasta oo kale. In kasta oo daryeel caafimaad oo bilaash ahi ka jiro dalka, dadka badankoodu ma jecla.*" (KQ 10 – Dhalinyaro)

"*Lacagta cisbitaalladu waa qaali, inta badanna ma awoodno, balse waxaa jira xarumaha hooyada iyo dhallaanka oo bilaash ah kuwaas oo bixiya la talin aasaasi ah.*" (KQ15 – xubin katirsan qabiilooyinka laga tiro badan yahay)

Ka-qaybalayaasha Hargeysa 25% keli ah ayaa sheegay in ay si weyn u helaan had iyo jeer ama mararka qaar daryeel caafimaad. Ka-qaybgalayaasha intooda badani waxa ay sheegeen in ay had iyo jeer ama mararka qaar ay helaan daryeel caafimaad oo xadidan. Ka-qaybgalayaasha 20% ayaa sheegay in ay u dhowdahay in ayna mar walba helin daryeel caafimaad, haba yaraadee. Daryeel caafimaad oo weyn waxaa lagu sheegay in aan si maalinle ah looga heli karin Hargeysa, iyada oo daryeelka caafimaad ee yar uu yahay adeegga ay suurtogal tahay in la helo.

"*Haddii aynu ka saarno xisaabta daryeelka caafimaad ee dowladda, cisbitaalka weyn, waa meesha keli ah ee furan Jimcaha ama fasaxyada guud. Haddii ay lugtu i jabto ama wadnaha la igaga soo boodo, ma helayo meel aan tago ka hor subaxnimada Sabtida. Xataa adeegyada caafimaad ee gaarka ah ayaan furnayn maalinta Jimcaha. Meel furani ma jirto.*" (KQ23 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya ka-qaybelinta/udhammaanshaha).

"*Waxa la heli karayaa waa daryeel caafimaad oo yar oo keli ah, (aad ka bixinaysid) jeebkaaga, maxaayeelay ma jiro daryeel caafimaad oo dowladeed oo dadku heli karayaan! Waa inaad caafimaadka qoyskaaga ka bixisaa jeebkaaga. Waa xaqiiqada ka jirta Somaliland.*" (KQ27 – Gabadh)

"*Waxa aan ku khasbanahay in aan aado cisbitaalka ama inaan helo daryeel caafimaad marka aan uur sido ama aan u dhowahay in aan umulo. Wakhtiga kale intiisa badan waxay u dhowdahay suurtogal inayna ahayn in aan aaddo cisbitaalka ama raadiyo kalkaalin caafimaad maadaama ay aad qaali u tahay, awooddaasna ma lihin.*" (KQ26 –ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

Arrinka bixinta lacagta daryeelka caafimaad ee ku weynaa Muqdihso ayaa aad looga hadlay Hargeysa.

"*Awooddayada oo dhan waa ay ka baxsan tahay, maaliyad ahaan, in aanu helno daryeelka caafimaad ee loo baahan yahay. Gebi ahaanba ma jiro daryeel caafimaad oo guud oo la heli karaa, sida oo kale ma jiraan qorshayaal gargaar oo taageeraya qoysaska saboolka ah intooda badan.*" (KQ35 – xubin katirsan beelaha laga tiro badan yahay)

*"Waa in aan jeebkayga ka bixiyaa daryeelka caafimaad ee qoyskayga iyo naftayda ba. Weligay maan arag qorshayaal daryeel caafimaad guud ama qaadhaan la xidhiidha arrintan."* (KQ37 – shaqaale dabaqad hoose ah)

*"Somaliland marka la joogo, helitaanka daryeelka caafimaad waxa uu ku xidhan yahay awooddaada dhaqaale. Waa in aanad filanin daryeel caafimaad oo guud oo wanaagsan."* (KQ22 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeyo shaqaalaysiinta)

*"Ma jiro daryeel caafimaad oo bilaash ah. Wax kastaa waa lacag."* (KQ24 – Shaqaale shirkad isgaadhsiineed)

*"Adeeggii caafimadku waa jiraa, balse ma jari/awoodi karno. Waa in aad lacag ka bixisaa daryeelka caafimaad ee dowladda iyo ka gaarka ahba."* (KQ30 – Dhalinyaro)

Waxaa la dareensan yahay in dadka lacagta badan haystaa ay dibadda u tagaan arrimahooda caafimaad, halkii ay daryeel caafimaad ka heli lahaayeen dalka.

*"Inta badan dadka lacagta lihi dibadda ayay tagaan si ay isu daaweeyaan."* (KQ35 – ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Somaliland kama jirto wax la yidhaahdo daryeel caafimaad oo bilaash ah. Haddii aad lacag haysatid waxa aad tegaysaa cisbitaalka weyn ama dalka dibaddiisa. Haddii kale, gurigaaga ayaa aad joogaysaa haddii aad bugtid iyo haddii kale ba."* (KQ33 – Barakacay dalka gudihiisa)

Sida oo kale waxaa la sheegay in falcelinta COVID-19 ay waxyeellaysay adeegyada caafimaad ee guud ee Hargeysa, iyada oo ay soo baxeen dib u dhaca daaweynta mushkiladaha caafimaad ee loo arko in ayna degdeg ahayn.

*"Waxa ay saamaysay bulshadayada, qoyskayga oo keli ah ma aha. Dadku waa ay ka baqayaan in ay tagaan cisbitaalka sababta oo ah waxaa ku sugan bukaankii COVID-19. Dowladdu waa ay ka gaabisay in ay meel u cayinto daaweynta bukaanka COVID-19. Hal cisbitaal ayaa ay u qoondeeyeen, balse cisbitaalka guud waxaa lagu qabanayaa wax kasta, gobollada Somaliland oo dhan ayaa loogu shaqaynayaa, oo cudur kasta oo weeyn ayaa lagu daaweeynayaa. Way is dhintay tirada dadkii rabay in ay cisbitaalka tagaan sababta oo ah waxa ay og yihiin in bukaankii COVID-19 ay joogaan; sidoo kale waa halka la iskaga baadho cudurka. Khalad weeyn ayay galeen markii ay dadka u sheegeen in haddii ayna xaaladdu degdeg ahayn  ayna cisbitaalka u iman baadhitaan/ is-hubin ama qalliinnada aan aadka umihiimka ahayn Taasi waxa ay keentay in dadkii ceeb ka daremaan cisbitaalka inay kaalmo ka doontaan. Aad ayay u saamaysay dadka. Waxaa dib loo dhigay ballamihii dadkii qabay cudurrada la kala qaado oo dhan. Wakhti ayay qaadanaysaa in la saxo khaladkaas. Dadkii iminka ceeb ayay dareemayaan. Waa ay baqayaan halkii ay cisbitaalka baadhitaan u iman lahaayeen. Iminka, cisbitaalka dowladdu waxa uu isku dayayaa in uu arrintan wax ka qabto sababta oo ah waxa ay og yihiin in uu dhinmay dadkii aan ahayn bukaaanka COVID-19.. Waxa ay isku dayayaan inay isugu geeyaan shaqada COVID-19 hal cisbitaal, oo ay ku jirto baadhitaanku."* (KQ21 – Masuul caafimaad oo dowladdeed)

# KALSOONIDA LAGU QABO TAYADA DARYEELKA CAAFIMAAD

Ka-qaybgalayaasha waxa aannu weydiinnay, "Jawaabahan soo socda kee baa ugu dhow in uu cabbiro aragtidaada ku aaddan tayada daryeelka caafimaad (ma aha COVID-19 oo keli ah ee deegaankaaga?".

**Shaxda 5aad: Kalsoonida lagu qabo tayada daryeelka caafimaad – Muqdisho**

| Kalsooni sare | Kalsooni dhexe | Kalsooni hoose | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|
| 1 | 7 | 9 | 3 |

**Shaxda 6aad: Kalsoonida lagu qabo tayada daryeelka caafimaad – Hargeysa**

| Kalsooni sare | Kalsooni dhexe | Kalsooni hoose | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|
| 0 | 5 | 15 | 0 |

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa aad ayaa isugu dhawaayeen dhanka kalsoonida ay ku qabaan tayada daryeelka caafimaad. Hal ka-qaybgale oo kaliya , oo kamid ah ka-qaybgalayaasha afartanka ah, ayaa ku jawaabay inuu  kalsooni sarreysa ku qabo tayada daryeelka caafimaad ee deegaankooda. Muqdisho, 7 qof ayaa kalsooni dhexdhexaad ah ku qaba daryeelka caafimaad ee deegaankooda, halka 5 qof ay kalsoonidaas ku qabaan Hargeysa.

*"Cisbitaallo badan ayaa ku yaalla aaggayaga, oo ay ku jiraan laba ay dowladdu maamusho, waa Cisbitaalka Madiina iyo Cisbitaalka Banaadir. Dhawaan ayaa dib loo habeeyay cisbitaalladan iyada oo ay gacan ka geysteen ganacsiyada gaarka ahi."* (KQ1 – Masuul caafimaad dowladeed)

Ugu yaraan 10% ka-qaybgalayaasha Muqdisho ayaa si cad u sheegay walaacyada iyo shakiga ku gedaaman shahaadooyinka iyo habdhaqanka xirfadlenimo ee dadka sheeganaya in ay yihiin dhakhaatiir.

*"Waa in dib loo eegaa tayada dawooyinka iyo howlwadeennada caafimaadka ee gaarka ah. Haatan, cid kastaa waa ay sheegan kartaa in ay dhakhtar yihiin."* (KQ2 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"U malayn maayo in tayada daryeelka caafimaad wanaagsan yahay. Waxaa jira dad badan oo sheeganaya in ay yihiin dhakhaatiir, balse Ilaahay ayuun baa og in ay run sheegayaan iyo in kale."* (KQ18 – Xubin ka tirsan sinjiyadaha laga tirada badan yahay)

Hal ka-qaybgale ayaa ba ka werwersanaa in uu ku sii bukoodo dawo khaldan in loo qoro.

*"Kalsooni yar ayaan ku qabaa daryeelka caafimaad ee aaggayga. Inta badan waxa aan tagaa rugo caafimaad oo yaryar, waxa aanan ka werweraa caafimaadkayga in ay isiiyaan dawo khaldan. Rugahaasi ma laha*

*dhakhaatiir xirfadlayaal ah ama kalkaaliyayaal caafimaad. Mararka qaar waxa aan maqalnaa qof ku bukooday dawo khaldan oo loo qoray."* (KQ12 – qof ka soo jeeda beel laga tiro badan yahay)

Cabsi kale oo la xidhiidha tayada adeegyada caafimaad ee laga heli karo Muqdisho waxa ay ku saabsan tahay in aan la haynin qalab la adeegsan karo oo ku filan.

*"Dawooyin ayaannu ka soo dejisannaa meelo aan la isku hallayn karin. Dhowaan baarlamaanku waxa uu ansixiyay xeerka mihnadlayaasha caafimaadka, waxa aanan rajaynayaa in la dhaqan gelin doono si loo hubiyo in ayna halis gelin nolosha iyo caafimaadka dadku."* (KQ2 – masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

Waxa sida oo kale walaac leh cunsurka dhaqaale ee haga xarumaha adeegyada caafimaad ee magaalada Muqdisho. Waxaa loo arkay in xarumaha adeegyada caafimaad bixiyaa ay tayada u loogayaan macaash awgeed.

"Dhammaan cisbitaallada aaggani waa macaash doon; waxa ay mudnaanta siiyaan dakhliga soo galaya, waxa ayna doonayaan inay wax badan ka helaan adeegyada ay bixinayaan." (KQ- Dhalinyaro)

45% ka-qaybgalayaasha Hargeysa iyo 75% kuwo Muqdisho ayaa tilmaamay in ay kalsooni yar ku qabaan tayada adeegyada caafimaad. Guud ahaan, ka-qaybgalayaasha Hargeysa ayaa kalsoonida ay ku qabaan daryeelka caafimaad ka yar tahay dhiggooda Muqdisho.

*"Ma ba lihi awood aan ku helo daryeelka caafimaad ee aan u baahanahay oo leh tayo munaasib ah. Waxa ay ku xidhan tahay awooddaada dhaqaale."* (KQ35 – xubin beelaha laga tiro badan yahay)

*"Run ahaantii, wax kalsooni ah kuma qabo tayada daryeelka caafimaad ee aaggayga. Waa in aad is-debbertaa, mana arko inay xaaladdu ka soo fiicnaanayso. Dhanka kale, dadku waa ay deggan yihiin, oo waa ku kalsoon yihiin xaaladda COVID-19 maadaama ay heleen wacyigelin."* (KQ37 – shaqaale dabaqad hoose ah.)

*"Kalsooni yar ayaa aan ku qabaa tayada daryeelka caafimaad sababta oo ah yaraanta xarumaha iyo khayraadka, iyo sida oo kale xirfadlayaasha caafimaad ee aan carbisnayn."* (KQ28 – Gabadh)

Cunsurka dhaqaalaha ayaa sida oo kale Hargeysa saameeya tayada daryeelka caafimaad.

*"Tayadu waxa ay ku xidhan tahay dakhligaaga, in aad yeelatid awoodda kala doorashada."* (KQ33 – ku barakacay dalka gudihiisa)

Ka warramidda dareenka in ayna carbisnayn xirfadlayaasha caafimaadka ee Muqdisho ayaa isna ka muuqday qaar kamid ah jawaabaha ka-qaybgalayaasha Hargeysa.

*"Ma jiro daryeel caafimaad oo ku filan dadka, sidaas tayadu ma aha ba arrin laga hadlo! Mar kale, waxaa jira xirfadlayaan shaqeeya oo aan carbisnayn. Waxa aan ka walaacsanahay agabka caafimaadka oo yar ama aan buuxinaynin halbeegyadii tayo ee loo baahnaa."* (KQ22 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"Kalsooni yar ayaan ku qabaa tayada daryeelka caafimaad sababta oo ah yaraanta xarumaha iyo khayraadka, iyo sida oo kale xirfadlayaasha caafimaad ee aan carbisnayn."* (P28 – haweenay)

Hal ka-qaybgale ayaa tilmaamay in ay sii ogyihiin waxa haya, iyo in aan natiijada cisbitaalku wax ba ku soo kordhinaynin.

*"Waa aan ka daalnay ku noqoshada iyo dib u eegista natiijada cisbitaalka iyada oo natiijadu tahay wax aan sii ognahay."* (KQ38 – ka tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay)

Kalsooni darrada lagu qabo xirfadlayaasha caafimaadka waxaa raacda in ganacsade yar

oo aan rasmi ahayn iyo qof kasoo jeeda sinjiyad laga tiro badan yahay ay soo jeediyeen in dawo dhaqameedku ay ka waxtar badan yihiin dawooyinka caadiga ah.

*"U malayn maayo in cisbitaalladu sidaas u xun yihiin, waxaad ogaan kartaa inay xun yihiin marka aad dhowr jeer u tagtid oo keli ah. Xaaladdayadu waa ay ka duwan tahay, waxa aan door bidnaa adeegsiga dawo guriga oo aan ogaannay inay wax ka taraan cudurro badan. Calool-istaagga waxa aad ku daaweeyn kartaa caano geel diirran, sinjibiil, xabaasuud iyo malab ayaad u adeegsan kartaa durayga iyo xasaasiyadda."* (KQ36-xubin ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Had iyo jeer marka aan cisbitaalka aado waxa aan u tagaa dhakhtarka dumarka. Markaan sidaas sameeyo, ama waa qaali ama waxay isoo siiyaan xidhmo dawooyin ah, mararka qaarna waxaan dareemaa in jidhkaygu la qabsaday maxaayeelay wax ba iga ma bedelaan. Markay taasi igu dhacdo, waxaan u wareeggaa dawooyinka guriga sida sinjibiisha, toonta, iyo xabaasuudda; waxtar ayay leeyihiin."* (KQ26 – ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

# QIIMAYNTA WARBIXINTA WEJIGA 1AAD

Kadib wakhti fiican oo ay ku akhriyaan warbixinta Wejiga 1aad, ka-qaybgalayaasha waxa aannu weydiinnay **"Fadlan qiimayn guud ka bixi warbixinta. Fadlan si daacad ah uga jawaab."**

**Shaxda 7aad: Qiimaynta warbixinta wejiga 1aad – Muqdisho**

| Aad u wanaagsan | Wanaagsan | Mana wanaagsana mana liidto | Liidta | Aad u liidta | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|---|---|
| 19 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 |

**Shaxda 8aad: Qiimaynta warbixinta wejiga 1aad – Hargeysa**

| Aad u wanaagsan | Wanaagsan | Mana wanaagsana mana liidto | Liidta | Aad u liidta | Ma ogi / Ka ma jawaabin |
|---|---|---|---|---|---|
| 19 | 1 | 0 | 0 | 0 | 0 |

19 kamid ah ka-qaybgalayaashii 20 ka ahaa ee Muqdihso ayaa warbixinta Wejiga 1aad ku qiimeeyay 'Aad u fiican', iyada oo hal ka-qaybgale ku tilmaamay warbixinta mid 'fiican' guud ahaan.

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho intooda badani waxa ay sheegeen in ayna soo-jeedinayn wax waxkabedel ah in lagu sameeyo warbixinta. Waxa ay noo sheegeen in uu xog ku kordhiyay in ka badan intii ay ka filanayeen. Faallooyinkii ka-qaybgalayaasha oo dhan waa lagu daray warbixinta. Waxa uu ahaa cilmi-baadhistii ugu fiicnayd ee COVID-19 ee ay ka qaybgalaan, iyo mid kamid ah cilmi-baadhisyadii ugu fiicnaa ee Soomaaliya laga hirgeliyo.

*"Aad buu u fiican yahay. Waa aan akhriyay*

*warbixinta oo dhan, waxa aan rabaa in aan idiin sheego in fahankiinna xaqiiqada dhulka tallaa mid u dhigantaa aanu jirin, xaqiiqatan."* (KQ8 – Gabadh)

*"Ma aha cilmi-baadhista keli ah ee COVID-19 ku saabsan ee aan ka qaybgalay, balse hubaal waa kii ugu fiicnaa marka la eego habaaciisa fudud ee loo dhan yahay."* (KQ14-qof ku barakacay dalka gudihiisa)

*"Waan akhriyay warbixintiinna oo dhammaystiran. Waxaan odhan karaa waxa uu kamid yahay aqoon baadhistii ugu fiicnayd ee lagu sameeyay Soomaaliya. Howl fiican ayaad qabateen."* (KQ2 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"Warbixinta waxaan ka helay xog ku saabsan saamaynta fayraska oo ka badan intii aan filayay. Waxaan uga jeedaa, waxaan u haystay in aan fahansanaa in uu dhaqaale ahaan saameeyay dad badan, balse saamayntu waa ay ka ballaadhan tahay sida warbixintu sheegayso. Sida oo kale, cabsida uu keenay iyaduna waa mid walaac weeyn leh."* (KQ11 –qof aan wax akhriyin wax na qorin)

*"Wax badan oo aan ku daro ma hayo. Waxa aan filayaa in aan loo baahnayn wax kale in lagu kordhiyo maadaama aad ku darteen qof kasta intii uu ku kordhinayay."* (KQ8 – Gabadh)

*"Warbixintu waa xogside fiican; waxaa na la weydiiyay walaacyada aan qabno, caalamka intiisa kalana waa lagaarsiiyay."* (KQ12 – Qof aan wax akhriyin waxna qorin)

Ka-qaybgalihii warbixinta ku qiimeeyay mid 'fiican', waxa uu soo jeediyay in toos loo la hadlo dadka aan ognahay in fayraska koroonahu toos u saameeyay.

*"Waxa aad la hadli kari lahaydeen dadka ka bogsaday fayraska si aad u eegtaan qaabka dhaqaale ahaan iyo nafsiyan uu u saameeyay. Miyay iska bixiyeen lacagtii daaweyntooda, tusaale ahaan? Ka warran dadka qaraabadooda cid kamid ahi u dhimatay fayraska, sidee ayay dareemayaan?"* (KQ7 – Haweenay)

Ka-qaybgalayaal kala duwan oo reer Muqdisho ah ayaa yiri warbixintu waxay ahayd mid loo dhan yahay. Waxa ay garawsadeen in looga dan lahaa abuurista jawi suurtogelinaya in si isku mid ah looga dhegaysto qof kasta aragtidisiisa, taas oo ay kujirto hubinta ku dhawaad kala badh ka-qaybgalayaashu in ay noqdaan haween; ka-qaybgelinta qaybo kamid ah bulshada oo badanaaba aan la aqoonsan' iyo in si isku mid ah loo tixgeliyay Soomaaliya iyo Somaliland. Qiimaha taageerada dhaqaale ee la siiyay ka-qaybgalayaasha ayaa isna la taageeray.

*"Warbixinta in loo dhammaa ayaa ka dhigtay mid laaxi laga jaraynin. Sida oo kale, kaalmadii dhaqaale aad ii fidiseen intii uu barnaamijku socday aad ayaa ay ii caawisay aniga, waxa aanan rabaa in aan idiin ka mahadnaqo."* (KQ13 – qof ku barakacay dalka gudihiisa)

*"Warbixintu waxa ay ahayd mid loo dhan yahay. Waxa ay isku dayday in lagu soo daro codadka heerarka kala duwan ee bulshada, heer dowladeed, heer dhalinyaro, dumar, barakacayaal dalka gudihiisa ah, iyo ashkhaas dakhli hooseeya."* (KQ1 – masuul dowladeed oo caafimaad)

*"Waa warbixin loo dhan yahay; waxaa qeyb ka ah heerarka kala duwan ee bulshada. Sida oo kale waxa ay isku dayday in ay muujiso aragtida dadyowga koonfurta Soomaaliya iyo kuwa Somaliland, si loo ogaado dareennadooda kala duwan."* (KQ8 – Gabadh)

*"Waxa aan arkay ku dhowaad kala badh ka-qaybgalayaasheennu inay yihiin dumar, taas oo ah mid wanaagsan. Dumarku waxyaabo badan ayay waajahaan, waxa ayna hayaan qisooyin shakhsi ah oo la xiriira dhibaatooyinka ay la kulmaan."* (KQ3 – masuul dowladeed oo ka shaqeeya u-dhammaanshaha)

*"Warbixintu waxa ay cod siisay xubno ka tirsan bulshada oo aan metelaad ku filan ka helin caalamka cilmi-baadhista. Xaqiiqadaas oo kale ah ayaa mudan sheegis iyo bogaadin"* (KQ20 – Qof laxaad la').

*"Warbixintu waa mid loo dhan yahay oo qaddarinaysa dadka lagu waraystay. Waxa ay dabooshay dareennada dadka aniga oo kale ah. Waa markii ugu horraysay ee qof la soo xiriiro bulshadayada si wax na loo weydiiyo. Aad Ayaan ugu faraxsanahay in warbixinta lagu soo daray qaybtii aan ku kordhiyay."* (KQ19 – Xoolodhaqde reer miyi ah).

Ka-qeybgalayaasha Muqdisho waxa ay tibaaxeen dareen badqab iyo tognaan. Waxa ay dareenkoodu u cabirineen si kalsooni leh, si dhiiranna way uga qaybgaleen, iyo waxayna ku hanweeynaayeen inay ka-qaybqaateen cilmi-baadhista Koofidh.

*"Waxaan aaminsanahay in uu aad u fiican yahay, waana aan ku faraxsanahay in la iga qaybgeliyay. Ma jiro wax dheeraad ah oo aan ku darayaa. Warbixintu waxa ay iga taageertay in aan fikirkayga si kalsooni leh u dhiibto."* (KQ12 – qof aan wax qorin wax na akhriyin).

*"Aad ayay u fiicnayd waxa ayna ii ahayd waayo'aragnimo in aan ka qaybqaato wax aan aaminsanahay."* (KQ14 –Qof ku barakacay dalka gudihiisa).

*"Ka-qaybgalka cilmi-baadhistan iyo aragtida warbixinta kama-danbaysta ahi waxay isiisay kalsooni in aan wax ku kordhin karo arrimo dheef u leh bulshada."* (KQ18 – Xubin ka tirsan sinji laga tiro badan yahay).

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa ay soo jeediyeen arrimo dhowr ah in baaritaan dheeraad ah lagu sameeyo. Waxaa kamid ahaa in si qoto dheer loo fiiriyo nidaamka daryeelka caafimaad, in la la xiriiro warbaahinta sooyaalka ah si loo fidiyo warbixinta iyo in la qoro warbixin dabogal ah.

*"Sida ay tahay ayay ku fiican tahay, balse kooxda cilmi-baadhista waxa aan u soo jeedin lahaa in ay sii wadaan baaritaanka arrimaha helitaanka daryeelka caafimaad ee Soomaaliya. Warbixinta waa lagu daray, balse waxa aan jeclaan lahaa in aan arko warbixin loogu talogalay arrinkaas oo keli ah."* (KQ1 –Masuul dowladeed oo caafimaad)

*"Warbixintani waa mid wanaagsan, balse waxa fiicnaan lahayd in la ogaado in aad warbixin ka dabo-tag/dabogal ah aad qoraysaan; halkan laguma xusin imminka."* (KQ7 – Gabadh)

*"Warbixinta waxaad ku daabacdeen degelkiinna, baraha bulshada iyo hilinnada kale ee xidhiidhka ee digital ka ah. Haseyeeshee, waxaa jira dad badan oo aan helin internet ama waraahinta digitalka ah. Waxa aad u fiicnaan lahayd in lagu baahiyo warbaahinta sooyaalka ah nuxurka warbixinta si uu dad badan u gaadho. Ma aha dhaliil ee waa soojeedin keli ah."* (KQ – Dhalinyaro)

*"Arrinta tan xigta ee aad ka fikirtaan ha noqoto sidii uu u gaari lahaa dadka ugu badan ee suurtogalka ah oo ay ku jiraan kuwa aan adeegsan internetka."* (KQ20 – Qof laxaad la')

Sida Muqdisho oo kale, 95% ka-qaybgalayaasha Hargeysa warbixinta Wejiga 1aad waxa ay kuqiimeeyeen mid 'aad u wanaagsan', iyada oo hal ka-qaybgale warbixinta siiyay guud ahaan qiimayn ah 'Fiican).

*"Warbixinta laaxin laga jari maayo."* (KQ28 – Gabadh)

*"Wax sii wanaajin ah oo aan halkan ka sheego ma hayo."* (KQ31 – qof aan wax qorin waxna akhriyin)

*"Warbixin layaab leh weeyaan, aad ayay ii la fiican tahay."* (KQ29 – Dhalinyaro)

*"Warbixin aad u fiican weeyaan sababta oo ah sida loo hindisay, diyaariyay, iyo in dad kala duwan ay si togan uga qaybqaateen, iyo in aad idinku, cilmi-baadhayaal ahaan,*

*aad hagayseen. Arrimahaas oo dhan oo la isku daray ayaa mid aad u fiican ka dhigtay."* (KQ25 – Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

*"Waxay ahayd tii ugu horreysay ee nooceeda ah. Dadku waxa ay isweydiinayeen xanuunka, cilmi-baadhistanna taas ayaa ay ka turjuntay xilligii ku habboonaa. Aqoon ahaan, ma jirto warbixin heerkan oo kale ah inta aan ka war hayo. Aad ayaa ay waxtar u yeelanaysaa marka laga falcelinayo saamaynta COVID-19."* (KQ22 –Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"Waxa aan ku qiimayn lahaa mid aad u wanaagsan sababta oo ah waa tii ugu horreysay ee nooceeda ah, inta ogaalkay, eek u saabsan Koofidh 19 ee deegaanka Soomaaliya."* (KQ30 – Dhalinayro)

Sababta ugu weyn ee qiimaynta 'Fiican' waxa ay la xidhiidhay qaabka khariidadaha kulka.

*"Waa ay kakanayd akhrinta jaantusyadu maxaayeelay ma garan kartid cidda hadalka tidhi, waana la is dul raseeyay."* (KQ23 –masuul dowladeed oo ka shaqeeya u dhammaanta/kaqaybgelinta)

Arrin ay ka-qaybgalayaasha Hargeysa ay ka sinnaayeen ayaa ah kala-jaadnimada kooxaha bulsho ee qeybta ka ah barnaamijka, iyo u dhannaanshaha toga nee uu abuuray.

*"Waxa ay ahayd warbixin ay u dhan yihiin kooxaha bulshadu, oo fiirogaar ah siisay kooxahaas kala duwan. Si wadajir ah ayaannu u wada shaqaynnay oo aannu ku soo saarnay warbixin kama danbays ah oo aad u fiican, taas oo faa'ido u yeelan doona Soomaalida oo dhan."* (KQ35 – xubin ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Waxaa naloo tixgeliyay in aannu qeyb ka nahay diraasadda, waxa aannu haynaa warbixintii; waa guul wadareed aad u fiican."* (KQ39 – xoolodhaqde reer miyi ah)

*"Waa natiijadii diraasad dhowaan laga sameeyay COVID-19 ee ay ka qaybgaleen Soomaalidu. Waxtar ayay u yeelanaysaa cilmi-baadhayaasha tixraac ahaan marka ay baadhayaan deegaannada Soomaalida. Waxa ay muujinaysaa sida dadku ay u la dagaalamayaan COVID-19."* (KQ30 – Dhalinyaro)

*"Arrin xiiso gaar ah leh ayay ahayd kala-duwanaanshaha ka-qaybgalayaashu taas oo muujinaysay waayo-aragnimooyin kala duwan iyo saamayn kala duwan."* (KQ38 – xubin ka tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay)

*"Waxa aan aad uga helay in warbixintu muujisay dhaqannada ka-hortagga Koofidh ee Muqdisho iyo Hargeysa. Sidoo kale waxa aan ka helay aragtiyaha kala duwan ee Hargeysa iyo Muqdisho ka dhiibteen doorka qurba-joogta. Waxa aad arkaysaa in Muqdisho ay aaminsan yihiin in qurbo-joogtu ayna kaalin ku yeelanaynin faafinta fayraska, halka ka-qaybgalayaasha Hargeysa ay aragti taban ka haystaan qurbo-joogta. Waxa ay muujinaysaa aragtiyaha kala duwan ee labada magaalo ee waaweyn ee Muqdisho iyo Hargeysa."* (K30 – Dhalinyaro)

Ka-qaybgalayaal kala duwan oo Hargeysa jooga oo ay kamid yihiin qof dalka ku barakacay, xubin tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay, qof dhalinyaro ah iyo masuul dowladeed oo caafimaad ayaa cabbiray aragtida in warbixinta lagu daro xogta ka-qaybgalayaasha oo dhan ay tahay mid togan oo waxtar leh.

*"Warbixintu aad ayay u fiicnayd; waxaa ayaa fiicnayd in wax laga ogaado dadka ka-qaybgalay barnaamijka oo la ogaado qisooyinkooda."* (KQ29 – Dhalinayro)

*"Xaqiiqada in warbixinta ay ku jirtay qisooyinka iyo xogta ka-qaybgalayaashu, taas oo fursad ii siisay in aan wax ka ogaado dadka ka qaybqaatay, aad ayaa ay u fiicnayd. Fasiraadda xogtu iyana aad ayaa ay u fiicnayd."* (KQ21 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya caafimaadka)

*"Waxa ay ila tahay in aan warbixintan laax-*

*in laga jaraynin. Taleefankayga gacanta ayaan ku akhriyay, xiiso badanna way lahayd akhrinta qisooyinka oo dhan iyo sida ururinta xogtaas oo dhami isugu rogi karto warbixin u qurux badan sida tan oo kale."* (KQ33 – Qof ku barakacay dalka gudihiisa)

*"Inaan xog dheeraad ah ka ogaado guud ahaan Soomaalida guud ayaa xiiso lahayd; dhab ahaan ayay ii taabatay akhrinta qisooyinka qof kasta. Waxa aan ka helay sida qoraalka warbixinta inteeda badani ay toos uga timi ka-qaybgalayaasha."* (KQ38 – Xubin ka tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay)

Tixgelinta la siiyay ka-qaybgalayaasha ayaa iyana si togan loo tibaaxay, iyada oo barnaamijka la hubiyay in aan la maqlin oo kale ah codka ka-qaybgalayaasha, balse in ay noqdaan codka ugu weyn ee la maqlo. Ka-qaybgalayaashu waxa ay taageereen abuurista jawi cid kastaa ay wax ku kordhin karto barnaamijka iyada oo ku salaysan xaaladdiisa. Waxa sidoo kale la taageeray dhaqankayaga ka-qaybgelinta loo dhan yahay ee ah in warbixinta loo akhriyo ka-qaybgalayaasha aan wax akhrin karin.

*"Waxa aan akhriyay warbixinno badan oo ku saabsan COVID-19, balse hore u ma aan arag warbixin ku dhowaad 95% ah waxay yidhaahdeen ka-qaybgalayaashu. Runtii waa arrin aad u fiican."* (KQ28 – Gabadh, Hargeysa)

Laba kaqaybgale ayaa tilmaamay in warbixinta tixraaca ahaan loogu adeegsan karo mustaqbalka cilmi-baadhisyada la xidhiidha Koofidh -19 iyo nolosha Soomaalida.

*"Dadka aanu is naqaanno ayaan la wadaagay, haddii qof u baahdo in uu ogaado noloshayadu sidii ay ahayd muddadii xanuunka Koofidhka, tixraac wanaagsan ayaa uu u noqonayaa."* (KQ33 – Qof ku barakacay dalka gudihiisa)

*"Tixraac wanaagsan ayaa uu u noqon doonaa cilmi-baadhayaasha cusub ee danaynaya deegaanka "Soomaalida. Waxa ay muujinaysaa sida dadku ay u la dagaalamayaan COVID-19."* (KQ30 – Dhalinayo)

Arrimo dhowr ah ayaa la soo jeediyay in baadhitaan dheeraad ah lagu sameeyo. Waxaa kamid ahaa kordhinta tirada ka-qaybgalayaasha, sare u qaadista heerka fidinta warbixinta, sii kala qaybinta fikradaha Soomaaliya iyo Somaliland iyo isbarbardhigidda heerarka waxbarasho iyo jawaabaha.

*"Sidoo kale, waxaan jeclaan lahaa in aan ogaado in heerka waxbarasho saamayn ku lahayd kala-duwanaanshaha aragtida."* (KQ23 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya ka-qeybgelinta)

*"Waxa aan ku talin lahaa kordhinta fidinta warbixinta inta ugu badan ee suurtogalka ah. Waa in wabixnta aynu gaadhsiinnaa dadka ugu badan maxaayeelay aad ayay muhiim u tahay."* (KQ30 – Dhalinyaro)

*"Haa, waxa aan soo jeedin lahaa in la kala saaro Soomaaliya iyo Somaliland sababta oo ah ka-qaybgalayaashu waxa ay muujiyeen aragtiyo aad u kala duwan. Waxaa suurtogal ah in meelaha qaar dadku ay wax badan ka og yihiin COVID-19, tallaabooyinka ka-hortagguna waa ay kala duwanaan karaan. Sidaas darteed, waxa aan ku doodayaa in aad kala saartaan wadciyada kaladuwan ee aadka u kala fog ee labda deegaan."* (KQ34 – Qof ku barakacay dalka gudihiisa)

*"Waa ay fiicnaan lahayd in la kordhiyo tirada ka-qaybgalayaasha. Imminka 40 qof oo keli ah weeyaan."* (KQ21 – Masuul dowladeed oo caafimaad).

# BAAHIN

Ka-qaybgalayaasha waxa aannu ka codsannay inay dadka uga warramaan barnaamijka, haddii ay ku niyadsan yihiin oo keli ah. Waxaan soo jeedinnay inay dadka uga warramaan arrimaha ay kamidka yihiin qaabka loo sameeyay barnaamijka, warbixinta iyo doorka ka-qaybgalayaashu ku lahaayeen. Ka-qaybgalayaasha ayaa xor u ahaa sida ay uga warramayaan, haddii ay noqoto inay qoyskooda iyo asxaabtooda kala hadlaan, baraha bulshada in ay soo dhigaan iyo in ay weriyayaal la hadlaan. Habraacani waxa uu kamid yahay habka aannu qaadannay ee soo-wadasaarista oo ka-qaybgalayaasha xorriyad u siisay hannaanka fidinta warbixinta. Sidoo kale waxa ay kamid ahayd habkayaga dheegashada, oo ah in wax laga barto baadhitaankana lagu sameeyo dhugashada waxa ay ka-qaybgalayaashu falaan ama ayna yeelin. Ugu danbayntii, waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa u heellanaantayada ka-qaybgalinta dhinacyada oo dhan; waxaa qayb ka noqday hannaanka dad haddii baahinta loo maro hababkii soo jireenka ahaa aan qayb ka noqon kari lahayn.

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho inta ugu badani waxa ay awood u yeesheen inay faafiyaan warbixinta iyo in asxaabtooda, qoysaskooda iyo bulshadooda kale kala sheekaystaan barnaamijka. Haseyeeshee, tiro yar oo kamid ah ka-qaybgalayaasha ayaan awoodin inay sidaas yeelaan mashquul awgeed. Bulshada kale ee ay la wadaageen waxaa kamid ahaa dad ay wada deggan yihiin, wada shaqeeyaan. Baraha bulshada gaar ahaan Facebook iyo WhatsApp ayaa loo adeegsaday faafinta iyo ka sheekaysigaas. Sidoo kale waxa la adeegsaday soo-koobiddii warbixinta ee taleefanka looga akhriyay ka-qaybgalayaashii aan wax akhriyi karin, iyada oo mid kamid ah ka-qaybgalayaashu taleefanka uga sii akhriyay ayeeydii.

*"Warbixinta waxa aan la wadaagay asxaabta iigu jirta WhatsApp iyo Facebook."* (KQ1 – Masuul dowladeed oo caafimaad)

*"Dokumentiyada iyo lingaxyadii waxa aan u sii gudbiyay asxaabtayda, dadka aan wada shaqayno iyo qaraabadayda."* (KQ2 –Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"Lingaxa dokumentiga waxa aan u sii gudbiyay dadka aan wada deggannahay iyo kuwa aan wadashaqayno."* (KQ4 –Shaqaale shirkad isgaadhsiin)

*"Warbixinta waxa aan uga sheekeeyay qoyskayga, balse wakhti uma aanan helin in aan uga warramo cid kale. Waxa aan u sheegay qoyskayga in aan wax ku kordhiyay warbixinta iyo in ay ku saabsanayd nolos-hooda iyo xaaladdooda."* (KQ6 – Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

*"Soo koobistii (odhaahda ahayd) ee aad ii sheegtay ayaa aan la wadaagay walaashay oo joogta Daafet"* (KQ11 – Qof aan wax qorin wax na akhriyin)

*"Maalmahan aad ayaa aan u mashquulsan-ahay, balse waxa ii suurtogashay in aan tafaasiil kooban la wadaago dhowr kamid ah qaraabadayda."* (KQ15 – Qof ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Aad ayaa aan u mashquulsanaa sidaas darteed ma aan awoodin in aan dad kala sheekaysto."* (KQ17 – Shaqaale dabaqad hoose ah)

*"Ayeeyday ayaan u sheegay warbixnta."* (KQ18 – Qof ka soo jeeda sinjiyad laga tiro badan yahay)

Dhiirigelin weeyn ayay lahaayeen jawaabaha ka soo nqoday markii ay ka-qaybgalayaashu warbixinta la wadaageen dad ka baxsan barnaamijka. Gabadh iyo qof xoolo-dhaqato reer miyi ah ayaa lagu hambalyeeyay in ay qayb ka ahaayeen barnaamijka, iyada oo labadooduba ay ka warrameen falcelin togan oo ay la kulmeen. Waxaa la sheegay in dadkaasi iyaguna ay warbixinta la sii wadaageen bulshadooda kale, iyaga oo ka warramay in ay

ka heleen akhrinta warbixinta; iyada oo hal qof uu jawaab sii fiican ka bixiyay sawirrada ka-qaybgalayaasha.

*"Aad ayay u soo dhaweeyeen warbixnta, waxa ayna hambalyeeyeen cid kasta oo ka-qaybqaadatay."* (KQ19 – Xoolodhaqato reer miyi ah)

*"Dadku aad ayay u soo dhaweeyeen, waa ayna igu hambalyeeyeen doorka aan ku lahaa warbixinta ka-qaybgale ahaan."* (KQ8 – Gabadh)

*"Qof kasta oo arkay warbixintu waa uu ila soo xidhiidhay, waxa aanu ii sheegay inuu ka helay akhrinta warbixinta. Qof ayaa iga waraystay sawirka miyiga ah ee warbixintayda oo si kaftan leh ii weydiiyay inaan qorshaynayo in aan halkaas ku howlgabo."* (KQ9 – Dhalinyaro)

*"Ingineeradu aad wax u ma akhriyaan balse qaar kamid ah ayaa muujiyay inay danaynayaan."* (KQ4 – Shaqaale shirkad isgaadhsiin)

*"Qoyskaygu waa ay ka war hayeen in aan ka qaybgalayo barnaamijka iyo in lacag la isiinayo mar kasta. Aad ayaa ay u jecelyihiin barnaamijkiinna."* (KQ5 – Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

"Dadku way itaageereen oo dareen togan ayay u muujyeen barnaamijka." (KQ20 – Qof laxaad la')

*"Waxa ay la wadaageen asaagooda."* (KQ2 - Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

Markii la weydiiyay ka-qaybgalayaasha Muqdisho sida ay u arkaan in laga codsaday in ay warbixinta iyo barnaamijka uga warramaan dadka, iyo sida oo kale inay sheegaan sida loo qaabilay, waxaa ka soo baxay laba arrin oo waaweyn. Ta koowaad waa in barnaamijku ahaa mid wadareed loo dhan yahay, oo ka dhigan in ka-qaybgalayaashu ay qayb ka noqdaan weji kasta. Ta labaad, ka-qaybgalayaashu waxa ay leeyihiin shabakado bulsho oo ballaadhan oo ay ku jirto baraha bulshada, oo ay tahay in looga faa'idaysto faafinta natiijoonka sida ugu fiican ee suurtogalka ah.

*"Falcelintu muhiim ayay idiin tahay sababta oo ah warbixintu waa howl wadereed, qof kastaa na wax ayuu ku kordhiyay."* (KQ18 – Qof ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Maadaama qof kasta oo naga mid ahi kaqaybgalay barnaamijka, waxa aad doonaysaan in ka-qaybgale kastaa uu faafiyo warka warbixinta."* (KQ19 – Xoolodhaqato reer miyi ah)

*"Waxaa keenay in falcelintu ay muhiim idiin tahay oo aad ka helaysaan fikrado badan oo aad ku sii wanaajisaan warbixinta ama warbixinnada kale ee aad mustaqbalka samaynaysaan."* (KQ20 – Qof laxaad la')

*"Waxaan filayaa sababtu in ay tahay in aad og tihiin in qof kasta oo naga mid ahi garanayo dad badan; waxa aad doonaysaan in aad gaadhaan dadkaas iyagana. Sida oo kale waxa aad doonaysaan in aad ogaataan sida dadkaasi uga falceliyeen."* (KQ15 – Qof ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Dad badan ayaa igu xidhan baraha bulshada, waanna ku faraxsanahay in aan dedaalkay gaadhsiiyo inta ugu badan ee suurtogalka ah, oo ay ku jiraan dad laga yaabo in ay awoodaan taakulaynta dadkan."* (KQ10 – Dhalinyaro)

*"Waa arrin aad u fiican in la faafiyo xogta warbixintan, warka howshii adkayd ee aad geliseen, waa na aad ku saxsanaydeen in aad ka-qaybgalayaasha ka codsataan inay sii fidiyaan. Ka-qaybgale kastaa waxa uu leeyahay asxaab iyo qoys iyaguna sii faafin kara warbixinta."* (KQ8 – Gabadh)

*"Waa wax caadi ah in asxaabta la weydiisto kaalmo. Haddii aan halkaaga ku jiraa, sidaada ayaan samayn lahaa."* (KQ3 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho intooda badani aad ayaa ay ugu faraxsanaayeen guud ahaan

barnaamijka, mana ay soojeedin wax ka bedello dheeraad ah. Haseyeeshee, waxaa jiray qodobbo aad u waxtar badan oo ay kamid yihiin in la adeegsado barnaamijyo gorfeyneed oo kombiyuutar si loo qiimeeyo waxtarka warbixinta, in loo turjumo af-carabi si loo suurtogeliyo helitaan dheeraad ah iyo warbaahinta sooyaalka ah oo ay ku jiraan warbaahinta daabacan, telefishannada iyo raadiyaha in loo adeegsado faafin dheeraad ah.

*"Waxa aad qabateen wax kasta oo aan ku bartay cilmiga xidhiidhka markii aad warbixinta ku baahiseen barahiina bulshada, sidoo kale na aad asxaabta iyo ka-qaybgalayaasha ka codsateen in ay dad badan la sii wadaagaan. Waxaan fursadda uga faa'idaysanayaa in aan idiin mahadnaqo oo idinku bogaadiyo shaqada wanaagsan ee aad qabateen; waxa aan rajaynayaa in-aad Soomaaliya iyo Somaliland ka samayn doontaan warbixinno kale oo fiican."* (KQ10 – Dhalinyaro)

*"Hadalku waa sida ugu fiican ee lagu faafin karo warka waxa ayna ila tahay in aad shaqo fiican qabateen markii aad ka-qaybgalayaasha ka codsateen in ay warka barnaamijka fidiyaan."* (KQ1 – Masuul dowladeed oo caafimaad)

*"Waxa ay ila tahay in aad warbixinta sidoo kale carabi u turjumi kartaan haddii ay suurtogal tahay."* (KQ18 – Qof ak tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay)

*"Waxa aan soo jeedinayaa in aad adeegsataan hilinno dheeraad ah sida warbaahinta qoraalka ah si aad u gaadhaan dad badan oo kale. Shaqo wanaagsan baad qabateen waanna idiinku hambalyaynayaa dhammaystirka howshan layaabka leh."* (KQ20 – Qof laxaad la')

*"Waxtar badan ayay yeelanaysaa in raadiyaha ama telefishanka lagu baahiyo qeybo kamid ah warbixinta ama nuxurkeeda haddii ay suurtogal tahay. Waxaa jira dad aan helin internet balse xiisaynaya warbixinta."* (KQ9 – Dhalinyaro)

*"Waxa aad adeegsan kartaan barnaamij gorfeyn sida Google Analytics si aad u aragtaan waxtarka warbixinta."* (KQ4 – Shaqaale shirkad isgaadhsiin)

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa intooda badani warbixinta waxa ay la wadaageen oo ku warrameen asxaabtooda iyo qoysaskooda, waxa ayna kala sheekaysteen ciddii danaynasay markay maqleen waraysiyada taleefanka ahaa ee aannu qaadnay. Warbaahinta bulshada sida Twitter, Facebook iyo WhatsApp ayaa dhammaan la xusay inay ahaayeen habab loo adeegsaday baahinta warbixinta, iyada oo qof dhalinyaro ahi uu nuqullo ku baahiyay baraha bulshada. Xubin ka tirsan sinjiyadaha laga tiro badan yahay ayaa barnaamijka uga warramay bulshooyinka Suuriyaanka iyo Yamanida ee Hargeysa. Sawirradooda iyo warbixinahooda ayaa iyagana ka-qaybgalayaashu u adeegsadeen faafinta xogta barnaamijka.

*"Waxa aan idiinka warramay dhammaan bulshooyika Suuriyaanka iyo Yamanida ee Hargeysa. Waxa aannu leennahay qol WhatsApp waxa aanan u diri jiray farriimihii iyo wararkii aynu isweydaarsannay. Sida oo kale waxa aan la wadaagay warbixinta oo aan ugu diray WhatsApp, aad ayay ugu faraxsanaayeen in aan qeyb ka ahaa barnaamijkan."* (KQ38 – Qof ka tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay)

*"Warbixinta waxa aan u diray saaxiibkay oo runtii baadhaya mawduucan. Xog ku filan ma uu heli Karin. Waxa uu dhigtaa Caafimaadka Guud, aad ayuuna uga faa'idayaa."* (KQ33-Barakace dalka gudihiisa ah)

*"Xubnaha qoyskayaga ayaan uga warramay warbixinta qoran iyo guud ahaan barnaamijka; aad ayay ugu farxeen in aan qeyb ka ahaa hannaankan oo kale."* (KQ29 – Dhalinyaro)

*"Qaar kamid ah asxaabtayda ayaan idiin ka sheekeeyay iyo barnaamijkiinnan. Sidoo kale waxa aan kala hadlay dadka khudradda igu ag iibiyay maxaayeelay waxa ay maqli jireen mar kasta oo aan taleefan ku wada hadalno. Sidaas darteed waxa aan uga warramay*

*sida aad ii caawiseen."* (KQ26 – Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

*"Warbixinta waxa aan ku faafiyay baraha bulshada sida Twitter, Facebook iyo WhatsApp."* (KQ21 – Masuul dowladeed oo caafimaad)

*"Waxa aan la sheekaystay bulshadayada xooladhaqaatada ee aaggan miyiga ah. Shaqo fiican oo layaab leh ayay ahayd."* (KQ39 – Xoolodhaqato reer miyi ah)

*"Sawir ayaan ka qaaday warbixintayda/sawirkayga markaas ayaan u diray."* (KQ31 – qof aan wax qorin wax na akhriyin)

Jawaabaha ka-qaybgalayaasha Hargeysa ay ka heleen dadka ay la xidhiidheen waxay ahaayeen kuwo togan. Ka-qaybgalayaasha qaar kamid ah ayaa sheegay in qaar kamid ah dadka looga warramay barnaamijku ay u sheegeen inay dareemayaan inay xog fiican ka heleen xaaladda COVID-19 guud ahaan, iyo in ay tahay xilligii ku habboonaa in warbixintan oo kale la soo daayo. Xiise ayay baahinta warbixintu u samaysay dadka Hargeysa, iyadoo qaar kamid ah ka-qaybgalayaashu ay sheegeen in ay xiisaynayaan inay mustaqbalka ka qaybqaataan barnaamijyo lamid ah.

*"Markii aan weydiiyay ra'yigooda, waxa ay ii sheegeen in ay waxyaabo badan ka barteen warbixinta oo ayna hore u ogeyn. Xog ku filan ayaa laga hayay xanuunka, sida looga hortago, saamayntiisa maciishaddda iyo dareenka bulshada."* (KQ30 – Dhalinyaro)

*"Ilaa hadda dhammaan waa kuwo togan, waxa ay sheegeen waa diraasad layaab leh."* (KQ22 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"Si togan ayay uga falceliyeen, waa ayna ka heleen. Waxa ay sheegeen inay shaqo wanaagsan ahayd. Waxa ay sheegeen in barnaamijka COVID-19 uu wanaagsanaa, oo ay qaddarinayaan."* (KQ27 – Gabadh)

*"Falcelintoodu waxa ay ahayd mid togan. Waa ayna ka heleen barnaamijka. Waxa ay tilmaameen muhiimadda warbixintu leedahay wakhtigan la joogo."* (KQ37 – Shaqaale dabaqad hoose ah)

*"Waa ay ku farxeen oo aad baa ay u qaddariyeen, sidoo kale waxa ay jeclaan lahaayeen in ay qayb ka noqdaan."* (KQ39 – Xoolodhaqato reer miyi ah)

*"Aad ayay u xiisneeyeen waxa ayna codaseen in barnaamijka lagu daro mustaqbal. Waxa ay jeclaadeen in ay wax badan ka ogaadaan barnaamijka."* (KQ40 – Qof laxaad la')

*"Akhristayaasha qaar ayay lamafilaan ku noqotay oo soo dhaweeyay in ka-qaybgalayaashu ay ka socdeen qaybo kala duwan oo bulshada ah. Waa waxa ka dhigay mid loo dhan yahay oo ka turjumaya xaaladda dadka ku nool Soomaaliya iyo Somaliland. Akhriste ayaa ka xumaaday tabaalaha dadka saboolka ah ee uu sababay COVID-19, halka mid kale uu jeclaaday maqalka codadka dadka la faquuqo."* (KQ21 – Masuul dowladeed oo caafimaad)

Ka-qaybgalayaasha waxaa aannu weydiinnay sida ay u arkaan codsigayaga ah in ay dadka uga sheekeeyaan warbixinta iyo inay annaga nooga warrmaan falcelinta ay la kulmeen. Ka-qaybgalayaasha Hargeysa aad ayay u soo dhaweeyeen, iyaga oo sheegaya intaasi muujinayso in kooxda barnaamijku ayna danaynayn barnaamijka oo keli ah balse ay danaynayaan ka-qaybgalayaasha. Sidoo kale waxa la tilmaamay in hay'ado badan oo kale ayna sidan u shaqaynin.

*"Waxa ay ila tahay in sidani aad u wanaagsan tahay. Waxa aan xasuustaa in aad wadahadkeennii ugu danbeeyay aad ii sheegteen. Balse waxa ay run ahaantii ila tahayin ay tani tahay danayn. Waxa ay ka dhigan tahay in aad doonaysaan in aannu qayb ka noqonno hannaanka."* (KQ38 – Qof ka tirsan beel laga tiro badan yahay)

*"Waa aan fahmi karaa sababta aad u doonaysaan falcelintayada in aad ogaataan, waayo waxa aan hubaa in aad*

*doonaysaan inaad ku dartaan warbixinta. Waa fikrad fiican oo ka dhiman warbixinnada intooda badan."* (KQ33 – Qof ku barakacay dalka gudihiisa)

*"Waxa ay ila tahay arrin aad u wanaagsan oo dhankiinna ah. Waxa ay tusaysaa in aad danaynaysaan dadka oo aad doonaysaan in aad caawisaan."* (KQ29 – Dhalinyaro)

*"Mar kasta waa in ay jiraan laba dhinac oo wax laga eego, in kasta oo hay'adaha warbixinnada diyaariya intooda badani ayna u shaqaynin sidiinna oo kale; xidhiidh iyo falgal ka badan ayaad samayseen. Natiijadu waxa ay noqonaysaa mid faa'ido u yeelata dhammaan dhinacyada."* (KQ28 – Gabadh)

*"Wakhti badan ayaa aad iga qaadateen, lacagna waa aad I siinayseen; waa aad u mahadsantihiin."* (KQ26 – Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

*"Shakhsiyan waxa ay ii la muuqataa sax iyo in ay tahay macquul in aad naga codsataan in aan warbixinta la wadaagno dadka, maadaama taasi ay badinayso akhristayaasha, dad bandanna ay ku heli karaan warbixinta. Macno samayn mayso in la qoro warbixinta oo keli ah kadibna ay akhriyaan dad koobani, waxa ay ka soo horjeedda ujeeddadii laga lahaa."* (KQ23 – Masuul dowladeed oo ka shaqeeya kamid ahaanshaha)

*"Waa fikrad wanaagsan in la isweydiiy falcelin iyo sida akhristayaashu u arkeen warbixinta. Waxa aan rumaysanahay in ay tahay sida lagu sii wanaajin karo shaqada ee hore loogu socon karo."* (KQ21 – Masuul dowladeed oo caafimaad)

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay soo-jeediyeen talooyin dhowr ah oo ku saabsan habraaca loo ballaadhin karo barnaamijka haddii ay suurtogal noqoto mustaqbalka. Fikradahaas waxaa kamid ahaa, in munaasibad loo qabto lagu falanqeeyo barnaamijka marka ay is dhinto halista COVID-19. Fikradaha kale ee fiicnaa waxaa kamid ahaa in awoodda la saaro waxbarashada iyo caafimaadka qoysaska saboolka ah; ballaadhinta barnaamijka si ay uga qeyb noqdaan dad badani, xeel-dheer-ayaal iyo baahin caalami ah; iyo boodhadh in loo adeegsado faafinta howsha.

*"Waxa aan soo jeedin laahaa in munaasibad loo qabto warbixinta, ka-qaybgalayaasha in nuqullo la sii siiyo, kadibna gole loo qabto lagu falanqeeyo. Falanqeyntu waxa ay noqonaysaa doodo, falcelinno iyo kulanno toos ah. Dadka qaar ayaa soo bandhigi kara faallo ayna rabin inay hadda meel ku soo qoraan, balse aad ayay munaasib u noqonaysaa."* (KQ22- Masuul dowladeed oo ka shaqeeya shaqaalaysiinta)

*"Waxa aan idiin soo jeedin lahaa in aad ballaadhisaan barnaamijka, oo aad dabooshan deegaan ka ballaadhan inta iminka, oo aad la xidhiidhaan kooxo badan oo kamid ah bulshada maxaayeelay shaqo fiican ayaad qabateen, waxaana u baahantihiin in aad ballaadhisaan."* (KQ25 – Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn)

*"Awoodda sii saara arrimaha COVID-19, gaar ahaan waxbarashada iyo dhanka caafimaadka, oo aan anigu tixgelin gaar ah siin lahaa. Waxa aan adkeynayaa in waxbarasha iyo caafimaadka qoysaska saboolka ah la siiyo tixgelin."* (KQ27 – Gabadh)

*"Barnaamijka u horumariya gole ku saabsan COVID-19 iyo Soomaalida. Heer caalami ka dhiga, la xidhiidha xeeldheerayaasha ugu badan ee suurtogalka ah, sameeya barnaamijyo socda oo ku saabsan COVID-19 oo dadku si isku mid ah u heli karaan."* (KQ30-Dhalinyaro)

*"Tixgelin siiya dhanka aadanenimada, dadka dhibaataysan ee aan haysan xataa wax ay karsadaan maalintii hal mar. Waxa aan ku doodi lahaa in la taageero dadka u baahan kaalmada."* (KQ32 – Qof aan wax qorin, wax na akhriyin)

*"Sii wanaajiya shaacnimada barnaamijka idinka oo boodhadh adeegsanaya si loo kordhiyo saamayntiisa."* (KQ34- Qof ku barakacay dalka gudihiisa)

# FALANQAYN

## Ka falcelinta heer degmo ee COVID-19

Waa uu kala duwanaa dareenka ka-qaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa ee ka-falcelinta heer degmo ee COVID-19. Dareenka ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa uu u badnaa mid togan halka ka Muqdisho u badnaa in aan falcelintu ahayn mid wanaagsan ama aan inta badan la arkayn gebi ahaan ba.

Ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa ay sheegeen in DFS ay ku badnaynd hoggaaminta tallaabooyinka lagu la dagaalamayo fayraska. Waxaa la sheegay in masuuliyiintu ay booqdeen degmooyinka Muqdisho intii lagu gudojiray ka falcelinta COVID-19, balse dedaalkooda aan la dareemin booqashooyinka ka dib. Tani waxa ay muujinaysaa bilowgii inay jirtay doonis iyo dedaal lagula dagaalamay COVID-19, balse ayna jirin awood ama heellanaan lagu sii wado howsha.

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay muujiyeen dareen dhiirigelin leh oo ku aaddan falcelinta degmooyinka. Waxa ay tilmaameen barnaamijyada wacyigelinta ee awoodda la saaray ee laga hirgeliyay magaalada oo dhan. Ka-qaybgalayaashu waxay dareemeen, sababta oo ah dedaallada kala duwan ee wacyigelinta, inay si fiican diyaar ugu yihiin la tacaalista COVID-19. Waxa ay arrintani ku dhabowday fahanka qotada dheer ee dhaqannada nadaafadda, muhiimadda ay leedahay kala-durugga bulshada iyo afdaboolashadu. Suurtogelinta aqoontan ayaa dadka Hargeysa u saamaxday in ay xil iska saaraan badqabkooda, taas oo dhalisay dareen iyo xaqiiqo ah in muwaadiniitnu ay si togan tallaabooyin ugu qaadayeen ka hortagga xanuunka. Haseyeeshee, dareenka kaas hore ka yar oo ah in dadku iyagu, ee ayna xukuumaddu, dhiirigelinayaan oo qaadanayaan tallaabooyinka ka hortagga ayaa keenay jawaabo soo jeedinaya in dowladaha hoose ee Hargeysa ay qaban karayeen in ka badan waxay qabteen.

Dareennada ku aaddan falcelinta COVID-19 waxay ahaayeen kuwii ka-qaybgalayaasha magaalooyinka Muqdisho iyo Hargeysa. Labada gooboodba, ka-qaybgalayaasha xoolodhaqatada reer miyiga ahi waxa ay sheegeen in ka-falcelinta COVID-19 ayna gaadhin ba meelaha sii durugsan. Tani waxa ay soo jeedinaysaa in la adeegsay hab bartilmaamsanaya magaalooyinka ay dadku ku urursan yihiin, oo ay garab socoto dareen ah in la dayacay dadka deggen miyiga; oo ah meelo aan helin taageero dowladeed iyo kaabayaal caafimaad marka hore ba.

## Helitaanka daryeel caafimaad

Dhanka helitaanka daryeelka caafimaad, ka-qaybgalayaasha Muqdisho iyo Hargeysa waxa ay u badnaayeen kuwo jawaabahoodu isu dhowyihiin. Xoolo dhaqatada reer miyiga ah iyo ganacsatada yaryar ee aan rasmiga ahayn ayaa si gaar ah ugu sii adkayd inay helaan daryeel caafimaad. Dadka reer miyiga ahi ma laha xarumo daryeel caafimaad oo ka jira agtooda. Hab u dhaca jawaabahani waxa uu u eegyahay aragtiyaha laga bixiyay ka-falcelinta degmooyinka ee COVID-19. Waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa in awoodda lasaaray daryeelka caafimaadka goobaha magaalooyinka ah ee dadku ku badan yihiin.

Ka-qaybgalayaashu waxa ay sheegeen awood la'aan dhaqaale in ay tahay caqabada ugu weeyn ee ka haysata helitaanka daryeel caafimaad magaalada Muqdisho. Haddii qofku tegayo xarun caafimaad oo dowladeed amase mid gaar ah, lacag in adeegga laga bixiyo ayaa la filayaa. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in ayna adeegyadii caafimaad ee jiray heli karin dadka hayntoodu yar tahay, oo dakhligoodana uu sii dhimay tallaabooyinka ka hortagga fayraska korona.

Tiro yar oo kamid ah ka-qaybgalayaasha ayaa sheegay inay ku tiirsan yihiin qaraabadooda qurbaha jooga si ay u bixiyaan kharashaadkooda daryeelka caafimaad. Haseyeeshee, tani waxa ay ku xidhan tahay xaaladda haatan

ee qaraabada, iyada oo sida lagu ogaaday warbixinta Wejiga 1aad, qurbojoogtu ayna awooddi hore u lahayn in ay caawiyaan qaraabadooda Soomaaliya/Somaliland sababtoo ah xannibaadaha COVID-19 ee jira.

Si loo taageero dadka uu saameeyay COVID-19 dhaqaale ahaan iyo caafimaad ahaan ba, masuul dowladeed, qof dhalinyaro ah iyo qof ka tirsan beel laga tiro badan yahay ayaa sheegay in ay jiraan tallaabooyin loo qaaday sidii daryeel caafimaad oo bilaash ah loo siin lahaa dadka bukaanka ah ee uu saameeyay COVID-19. In kasta oo ay jirto tallaabadan togan, waxaa la sheegay in daryeelkaas caafimaad ee bilaashka ahi aanu ahayn mid la isku hallayn karo iyo mid la heli karo toona, marka laga reebo unug takhasus ah oo loogu talogalay hooyada iyo dhallaanka oo aan xidhiidh la lahayn ka-falcelinta COVID-19.

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay tilmaameen yaraanta helitaanka daryeelka caafimaad ee weeyn marka la barbar dhigo Mogadishu, iyada oo kaqaybgalayaal tiro ahaan le'eg kuwa Mogadishana ay in ayna mar walba awood u ahayn helitaanka daryeel caafimaad oo dhan. Dhaqaalaha ayaa halkanna ah caqabadda ugu weeyn ee hortaagan helitaanka daryeel caafimaad, iyada oo lacag la iska qaado heer kasta oo adeeg. Isdiiwaangelinta bilowga ah ayaa lagu warramay in ay qeyb weeyn ka tahay kharashka adeegga caafimaad, waa ka hor inta bukaanku aanu helin ba wax baadhitaan ah, natiijo ama daawooyin. Sinnaansho la'aanta ayaa waxaa sii tilmaamay xubin kamid ah beelaha laga tirada badan yahay iyo qof ku barakacay dalka gudihiisa oo sheegay in dadka lacagta ku filan haystaa ay dalka dibaddiisa ugu baxaan daryeelka caafimaad ee ay u baahan yihiin, halkii ay Hargeysa daaweyn ka raadsan lahaayeen.

Habraaca ka-falcelinta COVID-19 ee Hargeysa ayaa sida oo kale la sheegay in uu si taban u saamaynayo adeegyadii caafimaad ee kale. Tallaabooyinka ay dowladda Somaliland u qaadday, si loo yareeyo xidhiidhka dadka fayraska sida iyo bulshada inteeda kale, waxaa kamid ahaa inay ku dhawaaqday in dib loo dhigo qalliinnada aan dedegga ahayn iyo kuwa fudud iyo arrimahaha kale ee caafimaadka ilaa xad intii suurtogal ah. Taasi waxa ay keentay in la dayaco dadkii lahaa xaaladaha caafimaad, iyo sidoo kale kororka cabsida laga qabo gelista cisbitaallada iyo ceeb-dareensiinta dadka uu ku dhaco, ama looga shakiyo COVID-19.

## Kalsoonida lagu qabo tayada daryeelka caafimaad

Si lamid ah helitaanka daryeelka caafimaadka, ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa ay sheegeen in awoodda maaliyadeed ee shakhsigu ay saamayso tayada daryeelka caafimaad ee uu heli karo. Tahli la'aanta helitaanka daryeel caafimaad oo tayo leh caqabado maaliyadeed awgeed ayaa keenay inta badan ka-qaybgalayaasha Muqdisho ay ku jawaabaan in ay kalsooni dhexdhexaad ah ama mid yar ku qabaan tayada daryeelka caafimaad.

Shakiga kugedaaman tayada daryeelka caafimaad lama xidhiidho oo keli ah lacagta. Ka-qaybgalayaashu waxa ay tilmaameen in badanaaba dad ay sheegtaan in ay yihiin dhakhaatiir iyaga oo aan lahayn shahaadooyinkii looga baahnaa, taas oo horseedaysa adeeg tayo liita, iyada oo qofku lacag bixinayo. Mushkiladahani waxa ay muujinayaan baahida loo qabo halbeeg u yeelidda xirfadda caafimaad, oo ay kamid tahay guddiyo caafimaad oo bixiya halbeegyada ugu hooseeya, la-xisaabtan iyo daahfurnaan ku aaddan tayada daryeelka caafimaad.

Shakiga ku aaddan xirfadlayaasha caafimaadku sida oo kale waxa uu gaarsiisan yahay khayraadka iyo qalabka caafimaad ee Muqdisho; iyada oo ka-qaybgalayaashu ay sheegeen in agabka iyo daawooyinku ayna ku filnayn. Hal ka-qaybgale ayaa isugu xataa cabsiyi ka haysay in uu sii bukoon doono marka uu qaato dawo loo qoray. Shakiga ku saabsan tayada ayaa sii xoojinaya cabsiyahaas, hoos na u sii dhigaya helitaanka daryeelka caafimaad.

Ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxa ay iyana

tilmaameen cabsiyahaas laxiriira dhakhaatiirta aan carbisnayn ee ka shaqaynaya deegaannadooda. Ganacsade yar oo aan rasmi ahayn iyo qof ka tirsan sinjiyad laga tiro badan yahay ayaa labadu ba sheegeen inay u badan tahay inay adeegsadaan dawo dhaqameedka intii ay ku kalsoonaan lahaayeen dhakhaatiirta Hargeysa iyo dawooyinka ay qoraan. Tani kuma iman oo keli ah shaki ku gedaaman sharciyadda dhakhaatiirta, balse waxa ay ka timi aaminaadda khaldan ee ah in dawo dhaqameedku ka waxtar badan yahay dawooyinka la qoro. Sida oo kale cunsur dhaqaale ayaa ka muuqda adeegsiga dawo dhaqameedka oo aad uga jaban dawooyinka farmasiiga.

Fahanka in dawo dhaqameedku ka waxtar badan yihiin dawooyinka caafimaad waxa uu sida oo kale xidhiidh la leeyahay haynta dhaqaale. Wejiga 1aad waxaa lagu sheegay in Agabka Dhowrista Shaksiga (PPE), oksajiin iyo agabka caafimaad ee kale ayna haysan xirfadlayaasha caafimaadku si ay ugu adeegaan bulshada Hargeysa iyo Muqdisho. Khayraadka la hayaa mar walba ma aha kuwo buuxinaya halbeegyada tayo ama kuwa cusub, taas oo keenta in is daaweynta kale ay ka fiican tahay.

Waxa cad in dadka Hargeysa iyo Muqdisho ayna ku kalsoonayn tayada daryeelka caafimaad ee ay helaan. Rukhsad bixin munaasib ah iyo qiimaynta xirfadlayaasha caafimaad iyo weli ba qalabkooda ay adeegsadaan ayaa taas wax ka bedeli karta.

## Qiimaynta warbixinta Wejiga 1aad

95% ka-qaybgalayaasha Hargeysa iyo Muqdisho waxa ay warbixinta Wejiga 1aad ku qiimeeyaan mid 'aad u fiican. Tani waxa ay muujinaysaa in lagu guulaysay metelaadda dadyow kala duwan oo ka socda qaybaha kala duwan ee bulshada Somaaliya iyo Somaliland.

U dhannaanshaha iyo badqabka ayaa ahaa arrimaha ugu waaweyn ee lagu ogaaday falanqaynta Wejiga 1aad ee warbixinta ee la yeeshay ka-qaybgalayaasha Muqdisho. Reer miyiga ka ag dhoow Muqdisho waxa ay noo sheegeen in ay ahayd markii koowaad ee bulshadooda lalasoo xiriiro oo si wax looga weydiiyo aragtidooda – tani waxa ay tilmaamaysaa muhiimadda ay leedahay in bulshooyinka reer miyiga ah laga qaybgeliyo cilmi-baadhista. Ka-qaybgale ka tirsan sinjiyad laga tiro badan ee Muqdisho ayaa noo sheegay in ka-qaybgalka barnaamijkan ay ka heleen kalsoonida iyo fahanka in aragtiyahooda iyo fikirkoodu dheef u yeelan karo bulshada balladhan. Taasi waxa ay muujinaysaa faa'idada dheeraadka ah ee la shaqaynta dadka codkooda aan had iyo jeer la maqlin.

Wax ka bedellada dheerad ka ah waxaa kamid ah habraac faaafineed oo bartilmaamsan iyada oo la adeegsanayo warbaahinta sooyaalka/soojireenka  ah halkii laga adeegsan lahaa kuwa digitalka/casriga ah. Waxa aannu aqoonsannay in qeyb yar oo kamid ah ka-qaybgalayaashu ayna helin internet, si loo xalliyo caqabadan bilowga ah, waannu u yeedhnay oo warbixinta ayaa aannu u akhrinnay. Go'aan talogal ah ayuu ahaa in aan heerkan la bixin nuqul daabacan sababta oo ah halisaha fayraska Korona ee ku gedaaman xidhiidhka tooska ah. Habraacaas ayaa isna laga fekerayaa in loo adeegsado raadiyowga Soomaaliya, oo ah mid kamid ah hababka loogu heli og yahay warbaahinta. Waxa sida oo kale hadda xidhiidh la la samaynayaa hay'ado warbaahineed oo soojireen ah iyo wakaalado warar si loo hubiyo baahinta ugu ballaadhan ee suurtogalka ah iyada oo qorshuhu yahay in la gaadhsiiyo dadka ugu badan.

Maadaama ku dhowaad dhammaan ka-qaybgalayaasha Hargeysa ay iyaguna warbixinta Wejiga 1aad ku qiimeeyeen mid 'Aad u fiican', waxaa cad in uu guulaystay habraacayaga ka-qaybgalayaasha u aqoonsanaya dad inay yihiin ee ayna tiro uun ahayn.

Ka-qeybgelinta kooxo kala duwan oo ka tirsan bulshada Soomaaliyeed, oo lagu suurtogeliyay xulashada dadyow kala duwan, ayaa ka dhignayd in ka-qaybgalayaashu dareemaan in barnaamijka lagu metelo. Xidhiidhka ka-qaybgalayaasha, oo lagu suurtogeliyay wadasheekaysiyo kooxeed qabsoomay mid

kamid ah wareegyadii danbe ee su'aalaha, ayaa sida oo kale abuuray xiriir dheeraad ah, ka-qaybgalayaashuna waxa ay aad u danaynayeen inay maqlaan aragtiyaha kaladuwan ee dhinacyada kale ee bulshada. Taasi waxa ay sii xoogaysaatay markii ay ka-qaybgalayaashu arkeen arrimaha ay ka siman yihiin oo badan oo aan ku saabsanayn aragtiyahooda oo keli ah balse la xidhiidha xaaladaha ay kusugan yihiin ee ay ku la tacaalayaan fayraska iyaga oo jooga laba goobood oo kala duwan. Warbixinnada ku saabsan ka-qaybgalayaasha ee ku jirta bilowga warbixinta Wejiga 1aad ayaa hoosta ka xarriiqday wejiga aadanimo, taas oo ka-qaybgalayaasha Hargeysi ay aad u dareemeen.

Ka-qaybgalyaal gaar ah, sida reer miyiga Hargeysa, ayaa ku nuuxnuuxsaday muhiimadda ay u leedahay in lagu martiqaado barnaamijka; dareen kaas lamid ah waxaa sidoo kale tilmaamay reer miyiga Muqdisho. Aqoonsiga dadyowgaas ku nool aagagga miyiga sii ah, oo ay garab socoto warbixinta in aan dowladdu la falgelin, ayaa si goonni ah hoosta looga xarriiqay; barnaamijkan ka hor fursaddan oo kale weligood la ma siinin. Taasi waxaa lagu sii aqoonsaday cilmi-baadhayaashu markii ay la xidhiidheen ka-qaybgalayaasha ee ay u akhriyeen warbixinta marka aysan iyagu iskood u akhrisan karin. Sababtu ha noqoto internet la'aan amaba in aysan wax akhriyi Karin, tallaabadaasi waxa ay sare u sii qaadday dareenka kamid ahaanshaha iyo in ayna dareemin in laga tegay  hannanku intii uu socday.

Laba talo oo muhiim ah  la soo jeediyay ayaa ah in kaqaybgalayaal dheeraad ah lagu daro barnaamijka iyo in la sii baahiyo warbixinta iyada oo la adeegsanayo warbaahinta sooyaalka/soojoreenka ah.Mustaqbalka waxa aanu jecelnahay in aanu ku darno ka-qaybgalayaal dheeraad ah, baahinta warbixinta Wejiga 1aad iyo 2aad na intaas waa ay sii socon doonaan, iyada oo lagu darayo fidinta adeegsiga warbaahinta sooyaalka ah. Soojeedin kale ayaa ahayd in la sii kala dhigdhigo jawaabaha, oo ah arrin aannu ku faraxsannahay in aanu samayno mustaqbalka.

Ka-qaybgale Muqdisho ku sugan ayaa soo jeediyay in la la xiriiro dadka qaba fayraska Koroona, ama kuwa ka bogsaday. Waa soojeedin xiiso leh, waa na aannu danaynaynaa in aannu sii wadno sahaminta hayaanka COVID-19 ee dadyowgaas, haddii ay noqoto caafimaadka jidheed iyo maskaxeed, maciishadda iyo kamid ahaanshaha bulshada. Arrimaha cabsida iyo ceeb-dareemista ayaa u baahan tacaamul munaasib ah. Xaaladaha qaar, waxaa loo baahanayaa in la qariyo magacyada dadka. Haseyeeshee, dad jooga Muqdisho ayaa diyaar u ahaa in muuqaal laga duubo iyaga oo ka hadlaya fayraska koroona in uu ku dhacay si loo dhimo cabsida iyo ceeb-dareemista dadka uu haleelay xanuunku.

## Dissemination

Ka-qaybgalayaasha labada goobood ba waxa aannu ka codsannay in ay warbixinta la wadaagaan shabakaadkooda bulsho. Tan waxa aannu u yeelnay si ku-talogal ah si loo hubiyo habraaca soo-wada-saarista iyo dhannaanshaha ee wejiyada barnaamijka oo dhan. Taasi wax ay nooga baahatay in aannu hubinno in qof kastaa qeyb ka yahay hannaanka si kasta oo ay mabsuud ku yihiin iyo in ay ka cudur daaran karaan haddii ay sidaas doorbidayaan.  In dhammaystiran kaqaybgalayaasha looga qaybgeliyo cilmi-baadhista sida tan oo kale  waa mid aan hore loo baran oo dhiirigelinaya udhammaansho iyo furfurnaan. Habkani waxa uu kasoo horjeedaa hannaankii caadiga ahaa ee kaqaybgalayaasha cilmi-baadhista la iskaga tegi jiray  marka xogta laga urursado. Hannaankayagan loo dhan yahay waxaa loo qaabeeyay sidii wadashaqayn dhamaystiran loola yeelan lahaa kaqaybgalayaasha, in la abuuro dareen  iyo lahaansho dhab ah, in lakordhiyo tirada dadka ka faa'iidaysan kara cilmi-baadhista iyo natiijooyinka kasoo baxa, iyo in lagaadho/la hawlgeliyo kuwii caadiyan aan laga qaybgelin jirin faafinta/baahinta. Maadaama aanu taageerayno  fikradaha horumarka waara iyo in sidii hore si  kasii fiican dib wax loogu dhiso, waa in aan hubanti ka dhignaa in mashaariicda cilmi-baadhista ee laga fulinayo Soomaaliya iyo Soomaaliland

ay ka badbaaddo galdaloolka weeyn ee ah in bulshadii loogu talogalay inay ka faa'iiddo aanay dib u arag ama wax falcelin iyo saamayn ah aysan ku yeelan karin natiijada cilmi-baadhista.

Ka qaybgalyaasha Muqdihso aad ayay ugu faraxsanaayeen in laga codsaday inay dadka asaagooda/aynigooda  ah la wadaagaan waayo'aragnimada barnaamijka iyo warbixinta kama-dambaysta ah. Dadyawga  ay sheegeen inay la wadaageen waxaa kamid ah asxaab, qoys, dad ay wada shaqeeyaan iyo dad ay wada deggen yihiin, habka ugu badan ee baahintuna waxa ay ahayd baraha bulshada, sheeko iyo taleefan. Ka-qaybgalayaal yar ayaan awood u helin inay ka qaybqaataan hannaankan wakhtigii la haystay sababo la xidhiidha mashquul hore, balse dadkaasi weli waxa ay haystaan in marka ay  fursad helaan dadka kale la wadaagaan oo falcelinta ay la kulmaanna soo gudbiyaan. In dad kakala socda qaybaha kala duwan ee bulshadu daneeyaan inay fidiyaan warbixinta  waxa ay tilmaamaysaa sida loogu dhan yahay barnaamijka iyo qiimaha xogtani u leedahay qaybo kala duwan oo bulshada ah. Markii aannu weydiinnay ka-qaybgalayaasha Muqdisho sida ay u arkaan habraacayaga faafinta warbixinta, mid kamid ah jawaabaha ugu badan ee nagu soo noqonayay waxay ahayd in habraacani caddayn u yahay u dhannaanshaha barnaamijka; sidaasna ka-qaybgalayaashu waxa ay ku xaqiijiyeen in aannu gaadhnay hadafkii udub dhexaadka u ahaa shaqadayada.

Falcelinta laga helay asxaabta ka-qaybgalayaasha Muqdisho waxa uu ahaa hambalyo. Taasi waxa ay sii xoojinaysaa aragtiyada ah in cilmi-baadhistu ay beegsato soo-wada-saarista faafinta oo loo dhan yahay. Qaar kamid ah dadka ay la xidhiidheen ka-qaybgalayaashu ayaa sheegay in ay sii faafiyeen warbixinta, taas oo caddaynaysa qiimaha iyo gaadhista dheeraadka ah ee laga helayo in ka-qaybgalayaasha lagu daro hannaanka baahinta warbixinta.

Ka-qaybgalayaasha waxa aannu weydiinnay sida mustaqbalka loo sii wanaajin karo warbixinta. Soo-jeedin ayaa ahayd in la diyaariyo nuqullo Carabi, Soomaali iyo Ingiriisi ah si loogu adeego qaxoontiga Carbeed ee jooga Soomaaliya. Taasi waxa ay warbixinta galaangal u siinaysa qaar kamid ah dadka loogu fogeyn ogyahay bulshada. Soo-jeedin kale oo faa'ido leh waxa ay ahayd in la adeegsado barnaamij sida Google Analystics oo la socota helitaanka barnaamijka ee internetka. Adeegsiga tiknoolajiyadda ee noocan ahi waxa ay abuuraysaa heer cusub oo lagu qiimeeyo faafinta warbixinta oo gaadhsiisan heer aad u tifotiran.

Hannaanka baahinta warbixinta ee Hargeysa si togan ayay uga jawaabeen dhammaan ka-qaybgalayaashu, haddii ay noqoto hannaana loo maray, jawaabaha ka yimi dadka kale iyo fahanka habraacayaga. Qaar kamid ah ka-qaybgalayaasha Hargeysa ayaa baahinta warbixinta u adeegsaday galaangalka ay u leeyihiin internetka iyo baraha bulshada, sida Facebook, iyo Twitter. Whatsapp ayaa sida oo kale loo adeegsaday in warbixinta iyo qeybo kamid ah sida sawirrada iyo warbixinnada ka-qaybgalayaasha  la gaadhsiiyo dadka kale sida bulshooyinka Suuriyaanka iyo Yamanida ee jooga Hargeysa. Marka ayna awood u lahayn in ay ku baahiyaan internetka, ka-qaybgalayaashu barnaamijka waxa ay uga warrameen qaraabadooda, asxaabtooda iyo jaarkooda; iyada oo hal ka-qaybgale uu daabacay nuqullo warbixinta ah si uu ugu qeybiyo asxaabtiisa. Ganacsadaha yar ee aan rasmiga ahayn ee khudradlayaasha waraysiyadiisu ku duulduuleen uga warramay barnaamijka ayaa tusaale cad u ah in habraacayaga baahintu uu taabtay nolosha dadyow aan haddii kale weligood wax ka ogaadeen howsha. Waa muhiim in farriinta la gaadhsiiyo dadkaas, balse inta badan lama tixgeiyo. Ka-qaybgalka firfircoon waxa uu tilmaamaya in dadkani ku taamayaan howsha iyo inay iyagu leeyihiin; waxa ay rabeen in cidda ugu badan ee suurtogalka ah –kamid ah bulshadooda dhow iyo in ka badan ba- inay ogaadaan oo fahmaan barnaamijka COVIDEV, iyo in ay qof ahaan qeyb lamahuraan ah ka ahaayeen hannaanka.

Jawaabaha laga helay bulshada ka-qaybgalayaasha ayaa iyana gebi ahaan ahayd mid togan, iyada oo ka-qaybgalayaashu ay sheegeen in dadka kale ay jeclaan lahaayeen inay qayb ka noqdaan barnaamijyada mustaqbalka ee kan oo kale ah. Falcelinta dhiirigelinta leh ee bulshada ballaadhani waxa ay sii xoojinaysaa aragtida ah in xidhiidhka tooska ah ee bulshooyinka la la sameeyo ee loo dhan yahay uu faa'iido u leeyahay oo la qaddarinayo. Xaqiiqada in dadku yidhaahdeen warbixinta waxaan ka helnay aqoon dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19, iyo sidoo kale fahanka xaaladda dadka Soomaaliya iyo Somaliland isna waa mid dhiirgielin leh oo wax lagu dhisi karo. Ka-qaybgalayaasha Hargeysa aad ayaa ay u qaddariyeen in wax laga weydiiyay warbixinta laftarkeeda iyo dadka kale sida ay uga falceliyeen. Waxa ay sheegeen in taasi ay muujisay danayn dhanka barnaamijka ah iyada oo sidoo kalena hubisay in dadka ugu badan ee suurtogalka ahi ay wax ka barteen barnaamijka.

Soo-jeedimaha kale ee ka-qaybgalayaasha Hargeysa waxaa kamid ahaa munaasib soo bandhigid in la qabto oo bulshadu ku falanqayso warbixinta iyo baadhitaan dheeri ah in lagu sameeyo kooxaha laga fursadaha badan yahay iyo qaabka caafimaadkooda iyo waxbarashooda uu u saameeyay COVID-19. Tani waxa ay muujinaysaa tudhaalaha iyo arxanka ka-qaybgalayaasha Hargeysa, iyada oo isla markaasna tusaysa muhiimadda barnaamijku u leeyahay iyaga iyo doonistooda in ay sii sahamiyaan mowduuca iyaga oo adeegsanaya cilmibaadhis iyo habraacii aannu si wadajir ah u hirgelinnay.

# GABOGABO

Wejiga 2aad ee COVIDEV waxaa ka soo baxay natiijooyin kala duwan oo cusub oo mustaqbalka loo adeegsan karo falcelin wax ku ool ah in laga bixiyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaad ee Soomaaliya iyo Somaliland, iyada oo xisaabta lagu darsanayo mabaadi'da horumarka waara iyo in si ka sii fiican dib wax loogu dhiso.

**Natiijo Muhiim ah:** *Ka-falcelinta COVID-19 ee aagga Magaalada ee Muqdisho inta badan lama haynin, balse ta Hargeysa ayaa uu wax ku ool ahayd. Tani waxa ay rogtay oo liddi ku tahay natiijadii warbixinta Wejiga 1aad.*

**Natiijo muhiim ah:** *Wax falcelin COVID-19 ahi kama ay jirin dhulka miyiga ah ee Muqdisho iyo Hargeysa: Tani waxa ay lamid tahay natiijadii warbixinta Wejiga 1aad.*

Ka-qaybgalayaashu waxa ay arkeen in ay maqantahay falcelinta COVID-19 heer degmo ee Muqdisho muddadii Wejiga 2aad ee dhammaadkii Julaay, iyada oo ay muuqato tallaabooyan kooban oo la qaaday. Si loo kordhiyo kalsoonida lagu qabo maamulka, waxa aannu soo-jeedinaynaa in la badiyo xidhiidhka heer bulsho, gaar ahaan tallaabooyinka lagu taageerayo kooxaha laga fursadaha fiican yahay sida dadka ku barakacay dalka gudihiisa iyo qoysaska saboolka ah. Hargeysa, waxa sarreysay qaddarinta wacyigelinta la xidhiidha tallaabooyinka ka hortagga; sii wadista habraacani qiimi ayuu leeyahay, balse waxaa weli loo baahan yahay in lagu kabo taageero mood ah oo dhanka dakhliga ah. Bulshooyinka reer miyiga ah waa lagu dayaycay Muqdisho iyo Hargeysa labadaba; tallaabo kasta oo laga hirgeliyo magaalooyinka waa in laga fuliyaa deegaamada sii durugsan.

**Natiijo muhiim ah:** *Helitaanka daryeel caafimaad aad ayaanu ugu filnayn Muqdisho iyo Hargeysa ba: hantiile in uu qof-ku yahay wax bay ka taraysaa balse maahamid damaanad qaadaysa, gaar ahaan Hargeysa.*

**Natiijo muhiim ah:** *Dadka intooda badani waxa ay maareeyaan helitaanka daryeel caafimaad oo yar, aqalliyad aad u balladhanna taas ayaan suurtogal u ahayn had iyo jeer.*

**Natiijo muhiim ah:** *Guud ahaan kalsoonida lagu qabo daryeelka caafimaad ee Muqdisho iyo Hargeysa waa hooseeyaa, gaar ahaan Hargeysa: hantiile in uu yahay qofku wax yar ayay taraysaa laakiin gebi ahaan wax ma bedelayso.*

Helitaanka daryeel caafimaad Muqdisho iyo Hargeysa wxaaa saamayn ku leh maaliyadda ka-qaybgalayaasha. Ku khasbanaanta in lacag laga bixiyo xataa daryeelka caafimaad ee ugu yar ayaa dadka ka eryaysa ka faa'idaysiga adeegyada caafimaad, iyaga oo dib ugu noqonaya dawo dhaqameedkii ama dooranaya in ay u safraan dibadda markii ay suurtogal tahay. Haseyeeshee, helitaanka daryeel caafimaad oo weeyn waa caqabad balaadhan, gaar ahaan Hargeysa, xataa haddii qofku haysto lacagtii loo baahnaa sababtoo ah maqnaanshiyaha weyn ee adeegyada caafimaad. Waxa sidoo kale badan shakiga laga qabo awoodda xirfadlayaasha caafimaad iyo khayraadka ay haystaan; waa baahi degdeg ah in maalgashi dheeraad ah lagu sameeyo daryeelka caafimaad ee Soomaaliya iyo Somaliland, iyo sidoo kale nidaamin munaasib ah iyo qiimaynta awoodda qofku u leeyahay xirfadle caafimaad in uu ku shaqeeyo. Ka-falcelinta COVID-19 dad badan ayay ka hor istaagtay in ay adeegsadaan cisbitaallada, xataa haddii loo xayaysiiyay inay bilaa lacag yihiin, waana in wax laga qabtaa ceebta ku gedaaman baqaha in qofku qaaddo xanuunka si wax looga taro ka falcelinta noocaas ah. Mar kale, dadyowga reer miyiga ah ee deggan meelo ka baxsan magaalooyinka ayay ugu hoosaysaa helitaanka daryeelka caafimaad marka loo eego cidwalba.

**Natiijo muhiim ah:** *Ka-qaybgelinta dadyow ah noocyada bulshada lagu faquuqo si ay cilmi-baadhayaasha uga la shaqeeyaan dhammaan heerarka cilmi-baadhistu waa mid loo baahan yahay oo waxtar leh – waxa ay sare u qaadaysaa tayada cilmi-baadhista, ururisaa xog haddii kale la waayi lahaa, waxa ayna suurtogelinaysaa u-dhannaanshaha shardiga u ah horumarka waara.*

**Natiijo Muhiim ah:** *Guusha dhammayska tiran ee geedisocodka baahinta ayaa muujinaysa in aanay xitaa aad ku adkayn dadka aan wax qorin, waxna akhriyin ee aan weligood helin waxbarasho toos ah inay si xoogleh uga qaybqaataan baahinta cilmi-baadhista. Sidoo kale waxay muujinaysaa in waxbadan laga faa'iidayo baahinta wadajirka ah.*

95% ka-qaybgalayaasha oo dhan waxa ay barnaamijka COVIDEV ku qiimeeyeen mid 'Aad u wanaagsan', oo ah qiimaynta ugu sarraysa, halka 5% soo hadhay ay ku qiimeeyeen mid 'Fiican'. Ku qanacsanaantan aadka u heer sarraysaa waxaa keenay qiimiga ay saareen ka-qaybgalayaashu ka-qaybgalkooda togan ee weji kasta oo kamid ah barnaamijka. Lahaanshiyaha uu suurtogeliyay habraacayagu waxa uu dhaliyay in ka-qaybgale kastaa uga falceliyo si togan. Sidoo kale waxa ay keentay in ka-qaybgalayaal badani ay soo jeediyaan fikrado wax-dhis ah oo ku aaddan sii wadista shaqada, oo ay kamid tahay in la la xidhiidho dadyowga haatan qaba fayraska koroona ama ka bogsaday; waa cilmi-baadhisyo ay ku talojiraan kooxda COVIDEV in ay galaan. Ka-qaybgalayaashu sidoo kale waxa ay arkeen in lagu hambalyeeyay in ay qeyb ka noqdaan barnaamijka marka ay dadka kale uga warramaan, waxaana ka soo baxday in dad badani muujiyeen danayntooda ah in ay qayb ka noqdaan barnaamijyo kuwan lamid ah. Habraaca barnaamijku waxa uu tilmaamayaa si loo sii wadi karo cilmi-baadhista iyo u-dhannaanshaha oo aasaasi u ah waarista horumarka.



# COVIDEV

COVIDEV waxa uu ka dhashay cilmi-baadhis iyo iskaashi ay sameeyeen Jaamacadda Bristol iyo Transparency Solutions oo ku saabsan dhowrista iyo dhiirigelinta horumarka waara ee Soomaaliya/Somaliland inta lagu gudo jiro, iyo iyada oo la adeegsanayo habka ka falcelinta Covid-19.

COVIDEV waxa uu qeyb ka yahay barnaamijka Dadaalka Soomaaliyeed ee Ugu horreeyay ee dhiirigelinaya horumar dhinacyada oo dhan ah oo ay Soomaalidu hormuud ka tahay. Waxaa barnaamijkan iska kaashanaya Jaamacadda Biristool iyo Transparency Solutions. Transparency Solutions waa bahwadaagta istiraatiijiga ah ee rasmiga ah ee Jaamacadda Bristol.

University of BRISTOL

GCRF Global Challenges Research Fund

Transparency Solutions